XISAAB

Tilmaame Bare

Fasalka 6aad

ISBN **978-99944-2-195-4**

XISAAB

Tilmaame Bare Fasalka 6aad



JAMHURIYADA DIMOQRAADIGA FADARAALKA ITOOBIYA
WASAARADDA WAXBARASHADA

MOE

JAMHURIYADA FADARAALKA DIMOQRAADIGA ITOOBIYA
WASAARADDA WAXBARASHADA

Birr 47.60

XISAAB

TILMAAME BARE

FASALKA 6aad

Qorayaal, Tafatirayaal, Ansixiyayaal

Cabdifatax Cumar Xuseen

Muuse Jaamac

Jamal Xasan Maxamad

Qiimeeyayaal

Maxamuud Cabdulahi Ibraahim

Khadar Budul Muxumud

Xasan Axmed Yuusuf (Muslim)

Jamhuriyada Dimoqraadiga Fadaraalka Itoobiya

Wasaarada Waxbarashada

Buugga waxa la daabacay 2002 E.C, Dajinta iyo soo saaridda buuggan waxa fuliyay wasaarada waxbarashada ee jumhuriyada Dimoqraadiga Federaalka Itoobiya mashruuca hoos yimaad ee uqaybsan kor u qaadista iyo horumarinta tayada waxbarashada Guud oo taageero ka helay hayada IDA Credit No. 4535 ET oo ah the Fast Track Initiative catalytic fund iyo dawladaha Finland, Italy, Netherland iyo United Kingdom.

Developed and Printed by

STAR EDUCATIONAL BOOKS DISTRIBUTORS Pvt. Ltd.

24/4800, Bharat Ram Road, Daryaganj,

New Delhi – 110002, INDIA

and

ASTER NEGA PUBLISHING ENTERPRISE

P.O. Box 21073

ADDIS ABABA, ETHIOPIA

under GEQIP Contract No. ET-MoE/GEQIP/IDA/ICB/G-07/0A.

ISBN 978-99944-2-195-4

TUSMADA BUUGGA

CUTTUB 1 FIKRADAHA AAS AASKA U AH URURADA

HORDHAC

Ujeedooyinka ugu waawayn ee cutubkani waa in ardayda laga dhigo kuwo yaqaana macnaha urur; noocyada xidhiidh ee ka dhexeeya ururada iyo xisaabfallada aasaasiga ah ee ururada qaar ka mid ah iyo inay awoodi doonaan inay samayn karaan xisaabfallada nooca ah iskood.

Tani waa marka koowaad ee arday fasalka lixaad ah la baro macnaha ururada. Haddaba waa in awooda la saaro in la hubiyo halka laga bilaabayo in lagu celceliyo, la xoojiyo iyo in si habaysan (nidaamsan) loo habeeyo tibxaha aasaasiga ah iyo summadaha la xidhiidha ururada.

Waxa cad in xisaabta fasalada dugsiga hoose ay ka buuxaan tirooyin, qaaciidooyin, sawiro, xeerar iyo waxyaalo kale, si kasta ha ahaatee, inagoo isticmaalayna sharaxaada iyo tusaalayaal kala duwan oo la xidhiidha ururada muuqaal ama walxo dhab ah oo laga helo deegaanka ardaydu ku nooshahay iyo sawiro ama summado, arday kasta waxaa laga caawin doonaa in uu fahmo xisaabtu inay tahay qaab gaar ah oo ka jawaab celinaya muuqaalka walax dhab ah. Habka kaabayaasha, habka qiimaynta, tusaalayaasha iyo waxyaalo kale, halka waxay ugu qoran yihiin waa qorshe kaliya ee ma aha wax kasab ah.

Talo bixinta la doorbiday waxay ina siinaysaa war kooban oo ku saabsan ujeedooyinka ciwaankan iyo inay tilmaan inaga siiso dhigista iyo habka waxbarashada. Kuwan waxaa ka mid ah dhammaan ama qayb ahaan kuwan soo socda:

- Sida heerka laga bilaabo loo hubinayo
- Sida hanuunin iyo dardargalin loo siin karo.
- Sida masalooyinka loo xallin karo
- Sida shaqada sabuurada loo qorshayn karayo
- Kalkaaliye noocma ah ayaa la diyaarin karaa si loogu taageero hab-baris barasho.

- Maxaa la qaban si laylis loo siiyo, loogu celceliyo ama loo habeeyo. Si kasta ha ahaatee, waxaa weeyi macalinka masuuliyadiisa in uu doorto qorshayaasha iyo tilmaamaha kuwaas oo u muuqda inay ku haboon yihiin gabadha ama wiilka awoodiisa iyo dabeecadiisa wax dhigideed iyo fahanka ugu fiican ee ardayga.

Ujeedooyinka waxbarasho

Dhammaadka cutubkan koowaad, ardaydu waxay awoodi doonaan in ay:

- *Caddeeyaan erayada cusub ee ururada si sax ah.*
- *Kala saaraan, hormo ururo quman, ururada isku midka ah iyo ururada isku-dhigma.*
- *Go'aanshaan dhextaalka iyo isu taga laba urur oo lagu siiyay.*
- *Sawiraan jaantuska feen si ay ugu muujiyaan dhextaalka iyo isutaga laba urur oo lagu siiyay.*

Kaabayaasha loo doorbiday Cutubka 1aad

- Muqarar, buugga ardayga iyo tilmaame bare ee xisaabta fasalka 6aad.
- Qalin qoriyo midabo kala duwan leh, (ardayda).
- Tamaashiir midabo kala duwan leh(sabuurada loo isticmaalo)
- Walxo sida furka dhalooyinka, dhagax toosh la isticmaalay, dhagax dixeed IWM, noocyo sumado ama walxo kala duwan u taagan oo laga helo deegaankooda.
- Shax (khariidad) ina tusinaysa jaantuska feen ee ururo cayiman; xidhiidhka ka dhexeeya iyo xisaab fallada aasaasiga ah ee ururada.

1.1 HORDHACA URURADA

Saacadaha loo qoondeeyay: 3 xisadood

Waxa ugu yare ee ardaydga laga rabo

Dhammaadka cuttub hoosaadkan ardaydu waxay awoodi doonaan in ay:

- *Sharxaan waxa uu yahay macnaha urur iyo ku tirsane.*

1.1.1 Qeexida Macnaha urur

Gudbinta Casharka

Intaanad siinin qeexida saxda ah ee urur waxaad isku daydaa in aad siiso tusaalayaal la mid ah kuwa ku yaala buugga ardayga, kuwaas oo ka caawin doona arday kasta in uu barto fikradaha aasaasiga ah ee urur iyo in ay eegaan xidhiidhka ka dhexeeya macna xisaabeedka urur iyo tala xidhiidha nolol maalmeedkeena maalin kasta. Waxaad ku bilaabi kartaa muuqaal duleed, kuwaas oo xidhiidh wadaaga sida qoys, urur dad ah (waalid iyo carruurtoodii) fasal “urur Arday ah” koox “urur ciyaartooy ah” IWM.

Walxaha aad isticmalayso waxaa loo baahan yahay in ay noqdaan ku ardaydu garanayaan tusaaleyaal xisaabeed oo saa,id ah sida :-

Ururka godadka, ururka tirooyinka idil, ururka tirooyinka tirsiimo, ururka shaxanada joometeriga iwm. Ayaa loo baahan yahay in la isticmaalo sidoo kale:-

Ku dhiri- gali ardayda in ay si firficoon uga qeybgalaan dooda- taasi waxay tahay in aad ardyda ku dhiirigaliso inay bixiyaan tusaaleyaal ay iyagu sameeyaan oo ku saabsan ururka si aad u eegtid inay fahmeen macnaha urur iyo xidhiidhka ka dhexeeya tusaaleyaasha duleed iyo fikrada xisaabeedka ururka (kuwaas oo ah, summada ama sawiro)

Dabadeed, ardayda u sheeg in erayga “urur” xisaab ahaan in uu yahay (sharaxo) walxo la isu ururiyey oo si fiican u qeexan (la kala sooci karo)

Jiritaankiisa, sii qeexida 1.1 ee ururka ee ku taala buugga ardayga. Ardayda waxaad ugu yeedhi (sheegi) kartaa in ay akhriyaan qeexida ku taala buugga ardayga.

Dabadeed, kuwo kale ha soo jeediyaan ama ha soo koobaan waxay soo akhiryeen,

Howlgalka 1.3 waxaa loo isticmaali karaa inay fahmaan waxaan uga jeedno si fiican u qeexan (xasuusnow in howlgalku ama shaqo fasalku ay xiiso leedahay marka ay ardaydu ka wada qeybgalaan)

Ardayda caawi si ay si fiican ugu fahmaan waxaan uga jeedo si fiican u qeexan adigoo isticmaalaya tusaaleyaal. Tusaale ahaan “ koox ardayda wiilasha quruxda badan ee dugsiga “ hagaag uma qeexna ama ma noqon karo urur waayo, ma jiro heshiis caan ah oo sheegaya waxa macnaha ardayda quruxda badani yahay.

Halka “ururka tirooyinka kisi ee tirsiimo ee ka yar 10) uu si fiican u qeexan yahay waayo in ku tirsaneyaasha ururkani yahay 1,3,5,7 iyo 9 . adigoo la xidhiidhinaya qeexida, xasuusi ardayda summada ururka ee {}. Sidoo kale xasuusi ardayga in walax kasta oo ururka ka tirsan lagu magacaabo kutirsane ama xubin , oo

summada xubinimaduna tahay , summada sheegaysa in aanu xubin ahaynina tahay, adigoo isticmaalaya tusaaleyaal, tus ardayda siday u isticmaali la haayeen summadahan sida ugu haboon.

Tusaaleyaasha ma, aha eh waxaa kale oo aad isticmaali kartaa howlgalka 1.3 ee soo socda, ee ku yaala buugga ardayga.

Tusaalaha soo socda ayaa loo isticmaali karaa ujeedadan.

Tusaale:- ka soo qaad in A utaagan tahay ardayda fasalka 6^{aad} .

Hadii cali yahay araday dhigta fasalka 6^{aad} , waxaan dhahaynaa Cali waa xubin ka mid ah ururka A.

Waxaanan u qornaa “Cali $\in$ A “ taasoo loo akhriyo cali waa kutirsane ururka A ah.

Haddii , Cabdi aanu ahayn ardayda dhigta fasalka 6^{aad} , dabadeed waxan u caddeyn karnaa tan “ Cabdi $\notin$ A “ taasoo loo akhriyo “ Cabdi ma,aha xubin ururka A “ ku caawi ardayda inay isticmaalaan summadaha ku haboon iyo tibxaha la xidhiidha ururka. Ka dooda su’aalaha 1t,3b,3j, iyo 4t ee layliska 1.1 adiga iyo ardaydaada fasalku.

Dabadeed u dir su,aalaha 1b,1j,2b,3t,4b iyo 4j ee layliska 1.1 shaqo guri ahaan, dood gaabana la yeelo markaad bilaabayso xiisada Labaad (ta ku xigta).

Hawgalka 1.1

1. Koox arday ah ayaa waxaa laga soo qaadayaa inay yihiin, koox kubdada cagta ah oo ka kooban 4 ciyaartooy, ururi digaagado, ardaydana jiiftaxa u jooji.
2. Dadka kubbada cagta ciyaaraya.
3. Koox kastaa waa 9 xubnood.

Urur madhan

Marka hore ku qor saburada waxoogaa urur ah (fiiri tusaalaha hoose) kaas oo leh ku tirsanayaal dhammaada.

Tusaale: A= {1, 3, 5} iyo B = {a, e, i, o, u}

Dabadeed ardayda waydii inay sheegaan inta ku tirsane ama xubnood ee ururkastaa leeyahay.

U tilmaan ardayda inay dhahaan:

- 1, 3 iyo 5 oo kaliya ayuu leeyahay ururka A, sidaasi darteed ururka A wuxuu leeyahay 3 xubnood.
- a, e, i, o iyo u oo kaliya ayuu leeyahay ururka B.

Sidaasi darteed ururka B wuxuu leeyahay 5 xubnood, marka xigta, qor tusaale urur aan lahayn wax ku tirsane ah, dabcan adigoo isticmaalaya weedho ahaan (sida ardayga).

Tusaale: ururka ardayda fasalka ee da'doodu tahay 100 jir.

Dabadeed waydii ardayda in ay taxaan xubnaha ururka haddii ay suurto gal tahay, hana sheegaan tirada xubnaha ururka. Waad waydiin kartaa haddii ay jiraan arday da'doodu tahay 100 jir ama waxaad dhihi kartaa ha soo horjoogsadaan ardayda horteeda. Ku hogaami ardayda in ay dhahaan "ururkani malaha xubno" ama "tirada xubnaha ururkani waa eber (0)".

Adigoo la xidhiidhinaya jawaabaha ardaydu bixiyeen, ku hogaami ardayda inay helaan fikrada urur madhan iyo summadiisa, taasi waxay tahay in aad ku hogaamiso ardayda inay dhahaan ururada noocan ahi ma'laha wax xubno ah, una sheeg in lagu magacaabo urur madhan ama urur aan waxba lahayn iyo in ururka madhan lagu sunto summada ama { }

{ogow in {∅} iyo { 0} aanay ahayn ururo madhan} tusaalayaal kale oo sa'id ah ayaa xaggan hoos ku taxan}

- Ururka bisadaha leh 8 lugood
- Ururka tirooyinka tirsiimo ee tiro dhaban iyo tiro kisiba ah.
- Ururka saddex xagalada leh 4 dhinac sii qeexida 1.2 ee ururka madhan ee ku qoran buugga ardayga. Waxaad u sheegi kartaa ardayda inay akhriyaan qeexida ku qoran buugga ardayga, una sharax waxa ay akhriyaan {xasuuso in aad isticmaasho in aad isu badasho haddii aad waqti u hayso} ka dooda hawlgalka 1.6 iyo su'aalaha 2, 3t iyo kh, 5b, 5x, 5r, 6t, ee layliska 1.2 ee ku yaala buugga ardayga, ardaydaada fasalka waxaad u diri kartaa qof-qof ama kooxo yaryar oo ka kooban 3 ilaa 5 in mid kastaa ka doodo su'aalaha xagga sare ku qoran. Markay ardaydu ka shaqeeyaan shaqada loo diray ku wareeg fasalka adigoo caawinaya shakhsiyada ama kooxda si qaldan u fahma ama qaldamaba in aad saxdo inta aanay samayn qalad wayn ama qalado waawayn.

  Dabadeedna u dir su'aalaha 1, 3b, j iyo x, 4, 5, 6t, 6j, 6d, 7b iyo j ee layliska 1.2 shaqo guri ahaan si koobana uga dooda su'aalaha ay arday badani kala kulmeen dhib xallinteeda (ama jawaabteeda)

Hawlgalka 1.2

b) {1, 2} t) ∅ ama {} j) ∅ ama {}

Ururada Dhamaadka leh iyo ururada aan dhammaan

Ururkan A ee soo socda ee leh kutirsanayaasha dhammaada ku qor sabuurada.

Tusaale: A = {1, 2, 3, 4, 5, 6, 7, 8, 9, 10}.

Waydii ardayda inay sheegaan inta xubnood ama kutirsane ee ururka A leeyahay.

Caawi ardayda si ay u xaqiiqsadaan. Maadaama kutirsanayaasha ururka A ay isku daba taxan yihiin midba midka kale, kama dambayntii way dhammaadeen, isticmaal tusaalayaal la mid ah (xidhiidha) (waxa kale oo aad isticmaali kartaa Tusaaleyaal (Hawlgalka 1.3) ee buugga ardayga) si aad macnaha aad ugu caddayso u sheeg ardayda in ururada noocan ah aan ku magacawno ururo dhammaada. Dabadeed waydii ardayda inay bixiyaan tusaalayaal ururada dhammaada ah oo fasalkooda dhexdiisa ah, dugsigooda ama guri si aad u aragtid inay u fahmeen macnaha si sax ah.

Mida xigta, ku qor tusaalahan soo socda sabuurada.

B = {tirooyinka idil}

Dabadeed waydii ardayda inay sheegaan, haddii ay suurto gal tahay waa kee ku tirsanaha ugu wayn ururka B, ama haddii ay karayaan ha taxaan ku tirsanayaasha ururka B,

Tusaalaha 1.4: buugga ardayga waxaa sidoo kale loo isticmaali karaa in laga doodo.

Caawi ardayda si ay u xaqiiqsadaan, in aanay suurto gal ahayn in ay sheegaan ku tirsanaha ugu wayn ururka B ama aan latixi Karin dhammaan ku tirsanayaasha ururka B. u sheeg ardayda in ururada noocan ah lagu magacaabo ururo aan dhammaan. Waydii ardayda inay bixiyaan tusaalayaal ururo aan dhammaan ah si aad u hubiso inay fahmaan macnaha ururka aan dhammaan. Su'aasha 6 ee layliska 1.2 waxaa loo isticmaali karaa dood ahaan iyo laylis ku saabsan ururo dhammaada iyo kuwo aan dhammaan.

Jawaabaha hawlgalaka 1.3

b) 5 t) 5 j) 5 x) aan xadlahayn

Jawaabaha Laylis 1.1

1. b. si fiican buu u qeexan yahay, waayo, ku tirsanayaasha ama xubnaha ururka waa la kala saari karaa, 1, 2, 5 iyo 7.
   t. si fiican uma qeexna, waayo? ma jiraan wax heshiis ah oo sheegaya, waxa ay tahay "shimbira is jara" dabadeed xubnaha ururka si fiican looma kala saari karo.

j. si fiican uma qeexna, waayo? ma jiraan wax heshiis ah oo sheegaya macnaha "gabdhaha quruxda badan" dabadeed ku tirsanayaasha ururka si fiican looma kala saari karo.

x. si fiican buu u qeexan yahay, waayo? Xubnaha ururka, in kasta oo tiro ahaan ay badan yihiin waa la kala saari karaa.

2. b. $y \in s$ t. $y \notin s$

3. b. $\notin$ t. $\notin$ j. $\notin$ x. $\notin$

4. b. 4 t. 5 j. 5.

Jawaabaha layliska 1.2

1. jawaabaha suurta galka ahi waa:
   b. ururka laydiyada goobooyinka ah
   t. ururka laba jibbaaranayaasha leh 5ta dhinac
   j. ururka tirooyinka kisi ee ah tirooyinka dhaban
   x. ururka bisadaha leh lixda lugood.
2. B iyo t oo kaliya.
3. b. 1 t. 2 j. 3 x. 4 kh. 0
4. maya, waayo T (A) = 1, T (E)=0 iyo $1 \neq 0$
5. b. dhammaada t. aan dhamaan
   J. dhammaada x. aan dhamaan
   kh. dhammaada d. aan dhammaan
6. b. aan dhammaan t. 4 j. 5

1.2 XIDHIIDHKA KA DHEXEEYA URURADA

Xiisadaha loo qoondeeyey: 6 xiisadood

Waxa ugu yare ee ardaydga laga rabo

Dhammaadka cuttub hoosaadka ardaydu waxay awoodi doonaan in ay

- *Sharaxaan xidhiidhka ka dhexeeya ururada sida hormo- urur quman, hormo urur, ururo isle,eg iyo ururo isku dhigma.*

B) hormo- ururo

Sabuurada ku qor laba urur oo mid ku tirsaneyaashiisa dhammaantood ay ku dhexjiraan ururka kale.

Tusaale A = {1, 2, 3, 4,} iyo B= {2, 4}

Weydii ardayda xidhiidhka ka dhexeeya ururka A iyo ururka B. ku caawi aradayda inay cadeeyaan in ku tirsane kasta oo B ahi in uu yahay sidoo kale ku tirsane A, ama B inay ku dhexjirto A dabadeed u sheeg ardayda in xidhiidhka ka dhexeeya B iyo A la yidhaa horm-urur ku qor hadda ururka A ee lagugu siiyey xagga sare iyo ururka kale oo la yidhaa C sabuurada taasoo ururka C uu leeyahay ugu yaraan hal kutirsane oo aanu lahayn ururka A

Tusaale:-

A = {1, 2, 3, 4,} iyo C= {2, 5}

Weydii ardayda inay sheegaan xidhiidhka ka dhexeeya ururka A iyo ururka C. ka caawi ardayda si ay u caddeeyaan in 2 tahay kutirsane labada ururba ku jira A iyo C ba. Inkasta oo 5 ay tahay ku tirsane ururka C ah, laakiin 5 aanay ahayn ku tirsane ururka A leedahay. Taasi waxay tahay in $5 \in C$ laakiin $5 \notin A$.

Sidoo kale, ururka C dhammaantii kuma wada dhexjiro A (ama dhammaan xubnaha C maha xubno A leedahay .

Hadaba , waxaan dhahaynaa C ma,aha hormo ururka A, sii ama weydii ardayda iney akhriyaan qeexida 1.3 ee hormo ururka. Adigoo la xidhiidhinaya qeexida, xasuusi ardayda summadaha hormo- ururka, $\subseteq$ iyo hormo urur ma, aha $\not\subseteq$

Ka dooda adiga iyo ardaydaadu howlgalka 1.8 iyo tusaalaha 5^{aad} fasalka dhexdiisa.

Ardaydu ha caddeeyaan, gacantana ha ka qabtaan macnaha hormo urur ayagoo isticmaalaya tusaalayaal kale oo sharaxaya

Tusaale: ka soo qaad in

Ururka B = { b,t } sheeg hormo- ururka quman iyo hormo ururada ururka B. waxaa sameyn kartaa lammaaneyaal ama kooxo yaryar oo ka kooban 3 ilaa 5 arday midkastaa si uu uga dooda howlgalka 1.9 iyo su,aalaha 2iyo 4 ee layliska 1.3 marka ay shaqeynayaan waxaad ku wareegi kartaa fasalka, adigoo caawinaya ama siinaya tilmaan shaqsiyada iyo kooxahaba inta ugu badan ee loo baahan yahay (ay lagamamaarmaan tahay) waxaad u diri kartaa su,aalaha 1,3, iyo 5 ee layliska 3 shaqo guri ahaan, dood gaabana kala dood ardayda markaad dhigayso cashrka xiga.

T) Hormo urur quman

Bar hormo-urur quman iyo summadeeda ($\subset$) si la mid ah sidii aad u bartay hormo ururka waxaad ku bilaabi kartaa tani adigoo xasuusinaya ardayda waxyaalo ku saabsan qeexida hormo urur. Waxaad xasuusataa in hawlgalka 1.10 aan ku soo sheegnay tirada hormo urur ee urur leeyahay . laakiin kama aynaan hadal wax ku saabsan ku tirsaneyaasha uu leeyahay hormo ururkastaaa.

Si kastaba ha ahaatee, hormo- urur quman markaan leenahay ma,aha in aan eegno oo kaliya ama hubino in urur uu ku dhexjiro urur kale, laakiin sidoo kale waaa inaan eegno ama isberbar dhigno tirada xubnaha urur kasta , taasi waxay tahay haddii B ay tahay hormo urur quman ee ururka T . dabadeed ururka T waa in laga dhex helo ururka B. dabadeed ururka T waa inay jirto ugu yaraan hal ku tirsane oo ay dheertahay ururka B. adigoo isticmaalaya summado,

Waxaan u qori karnaa si soogaabsan sida :-

$A \subset B$ $A \subseteq B$ iyo $A \not\subset B$

Ogow in haddii ururada B iyo T ay yihiin ururo dhammada,dabadeed BCT BCT iyo A(B) < B(B)

Sii qeexida hormo-urur quman (qeexida 1.4) adigoo qeexidan raacayn si aad ugu caddayso fikirka, waxaad isticmaali kartaa

Tusaalaha 1.7 (B) ama ururo kasta oo kale oo la mid ah kuwan. Waxaa kale oo aad ka su'aalaha 6, 8 iyo 9 ee layliska 1.3.

Jawaabaha hawlgalka 1.4

Dhammaan kutirsaneyaasha B sidoo kale waa ku tirsaneyaasha T.

1.2.2 Ururada isku dhigma iyo ururada isle,eg.

B) Ururada isku dhigma

Xasuuso in markaan doonayno macnaha ururo isku dhigma in aan caddayno waa in aan isticmaalno habka isku beegida ama isku aadinta laba urur ku tirsaneyaashiisa mid mid ujeedadan darteed waa in aad qorto laba urur oo la mid ah kuwa lagugu siiyey qeybta casharada hordhaca ah ee buugga ardayga .

Xasuusi ardayda in isu dhignaanta laba urur oo kasta oo isku dhigmaa aanay ku xidhnayn nooca ku tirsaneyaashiisa, laakiin ay ku xidhan tahay isku beegnaanta mid midka ah eeku tirsaneyaashooda. Sii ardayda qeexida ururada isku dhigma (qeexida 1.5 ama weydii ardayda in ay ku qoraan buugtooda qoraalka ah . adigoo la xidhiidhinaya qeexida tus aradayda summada loo isticmaalo isku dhignaanta laba urur ↔ si kooban uga hadal sida loo isticmaalo adigoo isticmaalaya tusaaleyaal la mid ah, tusaalaha 1.7 ee buugga ardayga, waxaad u diri kartaa su,aalo aad ka dooratay layliska 1.5 shaqo guri ahaan.

T) Ururada isku midka ah

Marhadaad u qeexday isku dhignaanta laba urur ma adkaan doonto in aad barto macnaha ururo isku mid ah, waayo , taani waxaa weeyi ururo isku dhigma oo ku tirsaneyaashoodu isku mid yihiin (ayadoon la eegayn siday u kala horeeyaan) ayaa la yidhaa ururo isle,eg arintan darteed, waxaad qaadan kartaa laba ururo oo la mid ah kuwa buugga ardayga ama kuwa lagugu siiyey xagga hoose , weydii ardayda iney sheegaan xidhiidhkooda.

A = {□,△,○} iyo

B = {○,□,△}

Markaad siiso qeexida ururada isku midka ah dabadeed (qeexida 1.6, buugga ardayga, bogga------,) ku caawi ardaydu inay sii fiican (cad) u fiiriyaan (fahmaan) guud ahaan (guud mar) "haddii A ⊆ B iyo A ⊆ B, dabadeed A = B" ka dooda hawlgalka 1.11 iyo tusaalaha 1.8 u na dir layliska 1.6.

Jawaabaha Layliska 1.3

1. Haa, C ⊆ D, waayo ku tirsane kasta oo ururka J sidoo kale waa ku tirsane ururka D,
2. b. {Axad, Arbaco} t. {Sabti}
   j. {Khamiis}
   x. {Jamcey}
3. Jawaabaha suurto galka ahi waa: {b}, [t},Ø (ogow; inay jiraan 2^4 ama 16 hormo urur)
4. Jawaabaha suurto galka ahi waa
   b. ururka gabdhaha fasalka
   t. {tirooyinka kisi ee tirsiimo ee ka yar 10}9ogow: inay jiraan 2^9 ama 512 hormo urur)
   j. {w, z} (ogow: inay jiraan 2^4 ama 16 hormo urur)
   x. {Arbaca, Jimce} (ogow: inay jiraan 2^7 ama 128 hormo urur)
   kh. {laba jibaarane, laydi} (Ogow: barbaroole, koorta iyo qardhaastu yihiin shaxano 4 dhinacle ah)
5. Ø, {1}, {2}, {3}, {1,2}, {1,3}, {2,3}, {1, 2,3} t) Ø,{5}, {9},{5,9}
6. {2, 4, 5}, {k, n} (Ogow: inay jiraan $2^5 - 1$ ama 31) hormo urur.
7. b. $\not\subset$ t. ⊂ j. ⊂ x. ⊂
8. Haa, waayo? Arday kasta oo ka mid ah fasalkiinu waa xubin ka mid ah dugsigiisuna.

Jawaabaha Layliska 1.4

1.





2. b. T(B) =3, T (T) =3, T(F) = 4
   t. B, T IYO J waa ururo isku-dhigma.
3. Ururka X waa inuu yeesho 5 xubnood.

4. {p,q}, {p, r}, {p, s}, {q, r}, {q, s}, {r, s}.
5. b. x = {1, 2, 3…,9}
   y = {11, 12,…, 19} Sidaadarteed x ⟷ Y

   t. Ardayda fasalkaaga waxaa u dhigma ururka sananka fasalkaaga, sidaadrteed P ⟷ Q

   j. M uma dhiganto N, waayo waxaa jira dhago laban laab kabadan ardayda fasalka.

   [Tusaale T(N)= 2xT (M)], mana noqon karto mid mid mid isugu beegan. Arday kastaa wuxuu ku beegmayaa laba Gabdhood.

6. A = C waayo xubnahoodu waa iskumid
   B = D = F waayo xubnahoodu waa iskumid
7. Haa, A = B, waayo, labada urur waxay ka kooban yihiin ku tirsanayaal isku mid ah: 1, 3, 5, 7, 9.

1.3 ADEEGSIGA URURADA

Xiisadaha loo qoondeeyay: 10 xiisadood

Waxa ugu yare ee ardaydga laga rabo

Dhammaadka cutub hoosaadkan ardaydu waxay awoodi doonaan inay:

- *Sheegaan dhextaalka laba urur oo lagu siiyay*
- *Sheegaan isku-taga laba urur oo lagu siiyay*
- *Isticmaalaan jaantuska feen si ay ugu muujiyaan dhaxtaalka iyo isku-taga laba urur.*

U sheeg ardayda ujeedooyinka cuttub hoosaadka

i) bar ardayda macnaha shaqada dhextaal iyo shaqada u tagga ururada

ii) caawi ardayda si ay u sheegaan dhextaalka iyo isku taga laba urur.

Intaanad barin dhextaalka iyo isku tagga ururada ka hor, ardayga u dir inay akhriyaan hordhaca, buugga waydii ardayda inay sharax kooban ka bixiyaan waxay ka fahmeen waxay soo akhriyaan. Hubi in ardaydu ay awoodeen inay fahmaan ku falida ururada ay la mid tahay xisaab fallada aasaasiga ah ee isu qaybinta, kala goynta, isku-dhufashada iyo isku qaybinta, taasoo ay yaqaaneen, kuna soo barteen casharadii xisaabfallada ee fasaladoodii hoose.

1.3.1 Dhextaalka ururada

Xasuuso in dhextaalka laba urur uu yahay urur kale sida isu gaynta laba tiro oo tirsiimo ay u tahay tiro tirsiimo kale. Intaanad siin qeexida dhextaal ee ururada, qaado lammaane ururo ah sida kuwa lagugu siiyay buugga Ardayga, tusna ardayda siday u samayn lahaayeen dhextaal. Caawi ardayda inay helaan ku tirsanayaasha ay labada urur wadaagaan. Si aad u samayso in macnaha dhextaal ardayda u cadaato, waxaad u baahan tahay in aad qaadato tusaaleyaal ku saabsan ururada oo aad u fudud sida kuwa laynagu siiyay xagga hoose, caddeena (sheeg) ku tirsanayaasha ay wadaagaan labada urur.

Tusaale: B = {1, a, 2, t} iyo T = {2, c, 4, a} tirsanayaasha ururka B iyo T ee lagu siiyay xagga sare. Ururkani waa {a, 2}. U sheeg ardayda in labada urur leeyihiin ku tirsanayaal ay wadaagaan, waxaa ku magacawnaa "dhextaalka ururada" ururka ka kooban ku tirsanayaasha ay wadaagaan labada urur waxaa la yidhaa "dhextaal" badanaa, arday badani waxay isku qaldaan ururada (taasi waxay tahay, waxay u qaataan in dhextaalka laba urur uu la micno yahay dhextaal). Sidaas darteed, waxaad u baahan tahay si aad ugu kala saartid faraqa u dhexeeya macnaha labada urur ardayda si cad in aad siiso qeexida 1.7 ee dhextaalka, una bartid summada loo isticmaalo dhextaalka "∩" waa inaan qorno dhextaalka ururka B iyo ururka T, adigoo isticmaalaya summadaha sida "B∩T" taasoo loo akhriyo "B dhextaal T" haddaba, tusaalaha sare B∩T ={a,2}.

Ardaydu gacanta ha ka qabtaan sida loo go'aansho dhextaalka laba urur ayagoo isticmaalaya tusaalayaal kale sida kuwa xagga hoose lagugu siiyay.

B = {ardayda fasalkiina}
T= {gabdhaha fasalkiina}, dabadeed
B∩T = {gabdhaha fasalkiina}.

Adigoo la xidhiidhinayaya qeexida 1.7 ee dhextaalka, waxaad qeexi kartaa macnaha ururo aan xidhiidh lahayn, tan waxad samayn kartaa adigoo qaata tusaalayaal fudud, sida kuwa lagugu siiyay qeexida 1.7 ama ururo kale oo fasalkiina ah sida:

Jawaabaha Hawlgalka 1.7

- Kutirsaneyaasha ay leeyihiin ururada A iyo B labaduba waa r iyo s.
- Ururka ka kooban kutirsaneyaasha ay wadaagaan A iyo B waxaa lagugu siiyey {r, s}.

T ={wiilasha fasalkiina} iyo G ={gabdhaha fasalkiina} labadan urur ma laha ku tirsanayaal (xubno) ay wadaagaan, waayo ururka T wuxuu ka kooban yahay wiilasha oo kaliya, ururka G wuxuu ka kooban yahay gabdhaha oo kaliya. Taasi waxay tahay T∩G =∅ .sidaasi awgeed, labada urur ee T iyo G waa laba urur oo aan

xidhiidh lahayn. Adigoo ku daraya tusaalayaasha buugga ardayga, ka dooda hawlgalka 1.13 iyo su'aasha 1t ee layliska 1.7 sdiga iyo ardaydaadu. Una dir su'aalaha 1b iyo J iyo 2 ee layliska 1.7 shaqo guri ahaan, (ogow in, ereyga iyo marka qaarkood loo isticmaalo dhextaal adeegsiga ururada iyo inay tani ardayda u cadaynayso).

1.3.2 Isu-taga ururada

Isu-taggu waa hab kale oo uruada loo adeegsado, taasi waxay tahay sida dhextaalka laba urur u yahay urur kale ayuu isu-tagooduna u yahay.

(ogow in dhextaalka iyo isu-taga laba urur uu noqon karayo labada urur midkood haddii mid uu hormo urur u yahay ka kale). Si ka duwan dhextaalka ayaan u fiirinaynaa ku tirsanayaasha ay leeyihiin labada urur, ururka hore ama ururka labaad ama labada ururba. Intaanad u qeexin isu-taga ururada ka hor. Qaado lammaane ururo ah, una tilmaan ardayda si loo sameeyo isu-taga ayadoo laysu gaynayo ama laysu darayo labada urur. Waa in loo caddeeyo ardayda in ku tirsane kasta la qoro hal mar uun isu taga dhexdiisa ka fikir (fiiro) in ay soo laba jeer noqoto hal ku tirsane.

Ka dooda hawlgalka 1.14 una sheeg ardayda summada loo isticmaalo u taga "$\cup$" iyo si loogu isticmaalo si sax ah iyo habka ugu haboon. Sii ardayda inay akhriyaan qeexida u taga ee 1.8 ee buugga ardayga kala dooda hawlgalka 1.15 iyo Tusaalaha 1.9 ardayda fasalka. Ku hogaami ardayda (tilmaan) siday samayn lahaayeen weedh guud (hawraar) oo ku saabsan tirada ku tirsanayaasha ee isu-taga laba urur. Taas oo ah: laba urur oo kasta A iyo B.

$$B(A \cup B) \leq B(A)+B(B).$$

Arintan darteed, waxaad isticmaali kartaa su'aalaha 1b & X, 2b & x, 3 iyo 5b ee layliska 1.8 uguna dir su'aalaha layliska 1.8 inta hadhay shaqo guri ahaa.

Jawaabaha Hawlgalka 1.8

{Cadbi, cali, khaddar, xasan, Hodan, xamda, faadumo}

1.3.3 Jaantuska Feen

Jaantuska feen wuxuu si xaqiiq ah kaaga caawin sidaa u xaqiijin lahayd xidhiidhada ka dhexeeya laba urur oo lagu siiyay. Ku miijinta urur lagu miijiyo jaantuska feen kaama caawinayso oo kaliya in aad fiiriso xidhiidhka ka dhexeeya laba urur oo

kasta oo lagu siiyay, laakiin sidoo kale waxay kaa caawinaysaa si aad u fududayso ka shaqaynta aad ka shaqayn lahayd adeegsiga ururada iyo fur-furista masalooyinka. Arintan darteed, waa inaad qaadato saddex lammaane oo ururo ah kuwaasoo ah:

i) Labada urur waxay leeyihiin xubno ay wadaagaan, sida:
B ={1,2,3,4} iyo
T ={2, 3, 4, 5}

ii) Labada urur ma'laha xubno (ku tirsanayaal) ay wadaagaan, sida:
J ={1, 3, 5} iyo
X ={2, 4, 6}

iii) Urur ayaa ah hormo- ururta quman ee ururka kale, sida
Kh = {1, 2} iyo D ={1, 2, 3, 4}

Xasuusi ardayda in ururadu u taagnaan karaan goobooyin ama sida ukunta.

Ardayda si aad ugu caawiso inay aqoon qoto dheer u yeeshan sida loo muujiyo ururada, xidhiidhka ururada hormo ururada quman, dhaxtaalka iyo isu-taga ururada ayadoo la adeegsanayo jaantuska feen, iyo isticmaalka jaantuska feen si loo xalliyo masalooyinka, waxaad istixmaali kartaa tusaalayaasha 1.10, 1.11 iyo 1.12 ee buugga ardayga iyo su'aalaha 5 iyo 6 ee layliska 1.9, waxa kale oo aad isticmaali tusaalayaasha iyo laylisyada aan soo sheegnay ma aha eh, waliba inaad ka doodaan su'aalaha 1 iyo 3 ee layliska 1.9. waxaad u diri kartaa su'aalaha 2 iyo 4 ee layliska 1.9 shaqo guri ahaan(ogow, in mararka qaarkood, erayga "ama"

loo isticmaalo isku taga adeegsiga ururada, ayna tani ardayda u fududaynayso).

Jawaabaha Layliska 1.5

1. b. $A \cap B = \{a, e\}$ t. $A \cap B = \{3, 5, 7\}$ j. $A \cap B = \emptyset$
2. b. $A \cap B = B$ t. $A \cap \emptyset = 0$ j. $A \cap R = A$.
3. b. $A \cup B = \{a, b, c, d, e, f\}$
   t. $X \cup Y = \{2, 4, 6, 8, 10, 3, 9, 12\}$
   j. $A \cup Q = \{2, 4, 6, 8, 10, \Delta, \hat{\square}, \square\}$
4. b. $n(A \cup B) = 6$
   t. $n(X \cup Y) = 8$
   j. $n(A \cup Q) = 8$

5. Haddii ay jiraan 4 – arday oo ka dhexeeya ardayda ururka xisaabta kooxda kubada cagta, dabadeed tirada ardayda ururka xisaabtu waa 22 – 4 = 18 kalya; tirada ardayda ee kooxda kubbada cagtuna waa 9-4 =5 kaliya. Sidaas darteed, tirada ardayda kooxda (ururka) xisaabta iyo ta ardayda kubada cagtu waxay isu yihiin 18+5+4 =27. Waxaan qori karnaa inagoo isticmaalayna summado sida: n(X∪Y) =n(X) +n(Y)- n (X∩Y)=22+9-4 = 27.
6. Sidaan isticmaalay su'aasha 3^{aad} ee xagga sare si la mid ah, ayaa la isticmaali karaa su'aashan hadaba, n(X∪Y) = n(X)+n(Y)-n (X∩Y)=a+b-c
7. b. A∪B = {2, 4, 6, 8, 1,3,5}; B∪A = (1,3,5,2,4,6,8}

   A∪B iyo B ∪ A waxay ka kooban yihiin ku tirsanayaal isku mid ah, waxay ku kala duwan yihiin siday ku tirsanayaasha u kala hormarsan yihiin qoraalka, haddaba A∪B = B∪A.

   t. (A∪B) ∪C = {2, 4, 6, 8, 1, 3, 5} ∪{b, t, j,x}
   = {2, 4, 6, 8, 1, 3, 5, b, t, j, x}
   A∪(B∪C) ={2, 4, 6, 8} ∪{1, 3, 5, b ,t, j, x}
   = {2, 4, 6, 8, 1, 3, 5, b, t, j, x}, haddaba
   (A∪B) ∪ C = A∪(B∪C), waayo waxay ka kooban yihiin ku tirsanayaal isu mid ah.

Jawaabaha Layliska 1.6

1.



2. b. t.



3. b.



t



1. Wadarta tirada macaamiisha la soo indho- indheeyay waa 75. Maadaama 11 macaamiisha ahi ay intuba jecel yihiin bariiska iyo baastada. Tirada macaamiisha ee jecel Bariiska oo kali ahi waa 35-11 ama 24, tirada macaamiisha ee jecel baastada oo kali ahina waa 41 – 11 ama 30, dabadeed tirada macaamiisha ee bariiska iyo Baastadaba jeceli waa 11+24+30 = 65. Haddaba, macaamiisha hadhay ee aan jeclayn Bariiska iyo Baastada midna waa 75–65 =10



5. wadarta ardayda la soo indha indheeyay waa 36, maadaama laba ka mid ah ardaydu doorteen saddexdaba, tirada ardayda ee dooratay kookaha ama faantadu waa 8-2 = 6 kaliya; tirada ardayda ee dooratay kookada iyo isbaraytkuna waa 15-2 = 13 kaliya; 15ka dooratay faantada, 8 ka mid ahi waxay diirteen kooke iyo isbarayt.

Sidaas darteed 15-8 ama 7 waxay doorteen faanto kaliya. 25ka doortay kookaha, 21ka mid ahi waxay doorteen faanto ama isbarayt, sidaas darteed, 25-21 ama 4 ayaa doortay kooke kaliya, haddaba waxaan ku muujin karnaa xidhiidhadan jaantuska fee nee socda.



t. 7 arday ayaa doortay faanto.

j. 12 (ama 7+2+3) ayaa faanto ama isbarayt doortay.

x. tirada ardayda dooratay kooka koole ama isbarayt waa 20 (ama 4+13+3) kaliya. Tirada ardayda dooratay kooka koola ama faanto waa 17(ama 4+6+7) kaliya.

Tirada ardayda doortay faanto ama isbarayt waa 10 (ama 7+3)

Haddaba, makhaayadu ha habayso ama (ha u kala horaysiiso) kooka kolaha iyo isbaraytka. Midka ardayda badankoodu doorteen.

Jawaabaha Layliga naqtinka ee Cutubka 1aad

1. b. Aan si fiican u qeexnayn
   t. Si fiicau u qeexan
   j. Si fiican u qeexan
   x. Aan si fiican u qeexnayn
2. b. Aan dhammaad lahayn
   t. Dhammaad leh
   j. Aan dhammaad lahayn
   x. dhammaad leh
3. {4, 5} iyo {5, 6} waa hormo ururo
4. b. $\in$ t. $\subseteq$ x. $\subseteq$
5. b. $A \cup B = \{2, 3, 4, 5, 6, 7\}$ t. $A \cap B = \{4, 5, 6\}$
6. Ururada ku jira b. j iyo d waa ururo madhaan
7. b. Run t. Run j. Been x. Run

8. b. Been t. Been j. Been x. Run

9. b. t.





$x \cup y = (1, 2, 5, 6, 7, 8)$ $x \cap y = (2, 5)$

10. b. $A \cup B$ t. $C \cap D = D$, sababta oo ah $D \subseteq C$ j. $x \cap y$

CUTTUB 2 U QEYBSANAANTA TIROOYINKA IDIL

HORDHAC

Ujeedada ugu weyn ee cuttubkan 2aad waa in la baro Ardayda macnaha u qeybsanaanta tirooyinka iyo ta ugu badan ee loo isticmaalo barashada hababka hubinta/xeerarka u qeybsanaanta, taasoo ku saabsan u qeybsananta 2, 3, 4, 5, 6, 8, 9 iyo 10.

Inkastoo Ardaydu ay baran doonaan wax badau oo ku saabsau dhufsaneyaasha iyo isirada tirooyinka idil, iyo sida loo go'aamiyo ama raadiyo isirweynaha ay wadaagaan (IWW) iyo Dhufsaneyaraha ay wadaagaau (dh.y.w) laba Ama seddex tiro idil oo lagu siiyey oo ka kooban laba god Ama hal god.

Cinwaau hoosaadada waxaa ka mid ah:- Macuaha u qeybsanaan, u qeybsanaanta Tirooyinka idil, Dhufsaneyaasha iyo isirada, tirooyinka Mutuxan iyo kuwa Farcan, Isiraynta mutuxan, Isirada ay wadaagaan iyo dhufsaneyaasha ay wadaagaan, IWW iyo dhyw ee Tiroo-yinka idil.

Ujeeddooyinka Cuttubka

Marka cuttubka 2aad dhammaado dabadeed, Ardaydu waxay awoodi doonaan in ay:-

- *Caddeeyaan u qeybsameyaasha tirooyinka idel ee 2, 3, 4, 5, 6, 8, 9 iyo 10;*
- *Caddeeyaan tirooyinka idil ee mutuxan iyo kuwa farcan;*
- *Qoraan isirada mutuxan ee tiro idil oo lagu siiyey.*
- *Raadiyaan Ama Go'aamiyaan isirweynaha ay wadaagaan (IWW) laba Ama seddex tiro oo idil oo ka kooban hal god Ama laba god;*
- *Raadiyaan Ama go'aamiyaan dhufsaneyaraha ay wadaagaan (dhyw) laba Ama seddex tirooyin oo idil oo ka kooban hal god Ama laba god.*

Ilaha loo doorbiday hagayaasha cuttubka 2aad

- Muqarar, Buugga Ardayga iyo tilmaame Baraha xisaabta fasalka 6^{aad}.
- Kalkuleytarada fudud, sida
- Shaxaha isku – dhufashada
- Shaxo ka kooban 100 ka tirooyinka tirsiimo ee ugu horeeya, sida ,

1	2	3	4	5	6	7	8	9	10
11	12	13	14	15	16	17	18	19	20
21	22	23	24	25	26	27	28	29	30
31	32	33	34	35	36	37	38	39	40
41	42	43	44	45	46	47	48	49	50
51	52	53	54	55	56	57	58	59	60
61	62	63	64	65	66	67	68	69	70
71	72	73	74	75	76	77	78	79	80
81	82	83	84	85	86	87	88	89	90
91	92	93	94	95	96	97	98	99	100

- Qalin qoriyo leh midabo kala duwan ama midabo kala duwan (oo ardyda ah)

2.1 MACNAHA U QEYBSANAANTA

Xiisadaha loo qoondeeyey: 6 xiisadood

Waxyaalaha laga rabo ardayga

Marka uu dhammaado cuttub-hoosaadka 2.1 Ardaydu waxay Awoodi doonaau in ay:

- *Coddeeyaan/dib u habeeyaan hubinta Ama xeerarka u qeybsanaanta tirooyinka idil ee 2, 3, 4, 5, 6, 8, 9 iyo 10.*
- *Ku shaqeyuta xeerarka hubinta u qeybsanaanta si looga jawaabo su'aalaha.*

Erayo Cusub

U qeybsanaanta, isiro, dhufsaneyaal, islraynta mutuxan, isirweynaha ay wadaagaan (IWW), dhufsaneyaraha ay wadaagaan (dhyW).

Tijaabooyinka/xeerarka u qeybsanaanta

Gudbinta Cashar ka:

(Fikrado ku saabsan barista Ama dhigista cinwaanada lagama maarmaauka ah ee cuttub – hoosaadka 2.1)

Hordhac

U jeedada ugu weyn ee casharkani waa sidii loo bari lahaa Ardayda macnaha u qeybsanaanta tirooyinka iyo hubinaha/xeerarka u qeybsanaanta tirooyinka idil ee 2, 3, 4, 5, 6, 8, 9 iyo 10. Iyo inay awoodaan in ay ku dabakhaan xeerarkan xallinta masalooyinka.

Ardayda casharka waad bari kartaa idinka oo ka doodaya masalooyin ka ku yaala buugga Ardayga. Ardaydu ha ka doodaan su'aasha. Waa maxay Aqoonta xisaabeed ee uu u baahan yahay Axmed si uu u xalliyo masalada furan?

U tilmaan Ardaydu in ay dhahaan:- Axmed waa inuu helaa dhammaan lammaaneyaasha isirada ee 144. Dabadeed, u sharax Ardayda iu caharkani uu muhimada saari doono macnaha u qeybsanaanta tirooyinka idil, iyo barashada hubinta/xeerarka u qeybsanaanta ee inta ugu badan loo isficmaalo u qeybsanaanta tirooyinka idil ee 2, 3, 4, 5, 6, 8, 9 iyo 10.

Inagoo casharka tixraacayna, Barayaashu waa in aanay in badan ka fekirin ama muhimada siin sida loo soo dhiraandhiriyo/ama loo helo qaaciidada tijaabinta/xeerarka laakiin, ay awooda saaraan sida loo go'aamiyo dabikhidooda, Tusaale ahaan, isirkaay wadaagaan ama dhufsaneyaasha ay wadaagaan iyo Isirweynaha ay wadaagaan (IWW) Ama dhufsaneyaraha ay wadaagaan (dhuw) laba Ama seddex tiroyyiu oo ka kooban ha lama laba god. Soo dhiraandhirinta hubinaha/xeerarka u qeybsanaanta tirooyinka idil ee 2, 3, 4, 5, 6, 8, 9 iyo 10. Waa in loo sameeyaa si talaabo – talaabo ah ayadoo ardayda lagala doodayo sida uu tilmaamayo qorshaha qeybinta ee hoos ku qorani.

Hubinaha Ama xeerarka kale ee u qeybsanaan, sida qeybsanaanta taramaha iyo uqeybsanaanta Wadaraha Ama faraqyada.

Waa in loo tixgaliyaa sida kuwan inaga caawin doona hubinta u qeybsanaanta tirooyinka qaar ka mid ah (4 iyo 8) inagoo tau tixgalinayna, qoondaynta qeybinta xiisadaha ee soo socda ayaa la qorsheeyey/baahday.

1. Qorshaha Qeybinta
   - Casharka 1^{aad}:- Barista tijaabooyinka/ xeerarka qeybsanaanta 2, 3 iyo 5.
   - Casherka 2^{aad}:- Barista tijaabooyinka/xeerarkauqeybsanaanta 6, 9 iyo 10
   - Cashaerada 3^{aad} iyo 4^{aad}:- Barista tijaabooyinka u qeybsanaanta taramaha iyo u qeybsanaanta wadaraha/faraqyada
   - Sii gudo – galka tijaabooyinka/xeerarka u qeybsanaanta 4 iyo 8.
2. Dardar – gelin: masalooyinka hordhaca ah ee Buugga Ardayga ku jira Waxaa loo isticmaali karaa in la nakhtiimo nuxurka (macuaha) uqeybsanaanta ayadoo lala xidhiidhinayo taranta tirooyinka; taas oo ahi xidhiidhka ka dhaxeeya tarauta iyo isirada, iyo habka (jidka) isir kasta loogu caddayn (muujin) karo xidhiidh taraneed.

Tusaale ahaan: 42 wey u qeybsantaa 7 waayo 42 ÷ 7 = 6 (ama 42 = 7 × 6). Isir kastaa (Sida, 6, 7) waa isirka taranta, 42. Sidoo kale 42 waa dhufsane isir kasta (ama tarantn waxay u qeybsantaa isir kasta Ama qeybiye kasta).

B) Ka shaqeynta tijaabooyinka/xeerarka u qeybsanaanta 2, 3 Ama 5. Guud ahaan habku waa in uu la mid ahaado ka lagugu siiyey Ama ku yaal beuugga Ardayga ayadoo la isticmaalayo hawlgalka 2.1 ee shaxda 1aad ee isku – dhufashada tiro kasta, lana eego qaabka taramaha laga helay jog u tax kasta Ama isugeynta (ururin) xidhiidhka ka dhaxeeya tirooyinka ku jira hal joogtax iyo kuwa kale. Waad soo koobi kartaa Dooda adigoo isticmaalaya xeerarka 1, 2 iyo 3 (Tijaabooyinka u qeybsanaanta 2, 3 iyo 5) ee buugga Ardayga.

Tusaalaha (Tusaalaha 1aad) xeerarkan soo socda waxaa loo isticmaali karaa in casharka lagu xoojiyo, dabikhid, suaalo laga doorto layliska 2.1 (laga dhexdoorto su'aalaha 1, 2, 7, 8, 9) Waxaa loogu diri karaa shaqo guri ahaan.

T) Ka shaqeynta tijaabooyinka/xeerarka u qeybsanaanta ee 6, 9 ama 10 (xeerarka 4, 5 iyo 6). Habka ama hababka loo isticmaalo tijaabooyinka/xeerarka u qeybsanaanta ee 2, 3 iyo 5 waa loo isticmaali karaa halkan

Waa in loo caddeeyo Ardayda in u qeybsanaanta 3 ama 9 aan loo habayn Karin si la mid ah u qeybsanaanta 2, 5 ama 10 (sida Fiirinta godka ugu dambeeya ama godadka tirooyinka) waayo ma jirto jibbaarka 10 oo u qeybsama 3 Ama 9. Habka lagu isticmaalo 3 iyo 9 Wuxuu noqon in la eego "wadarta godadka" ee tiro kasta oo idil ama wadarta godadka isku – xiga, lana hubiyo in wadaraha la helay u qeybsamaan 3 ama 9, Tusaalaha 2, xeerarka soo socda ee 4, 5 iyo 6 (Buugga Ardayga) waa loo isticmaali karaa ujeedadan.

J) ka shaqeynta tijaabada/xeerka u qeybsanaanta 4 (Xeerka 7aad)

Intaan laga shaqeyn tijaabada/xeerka u qeybsanaanta 4 (iyo sidoo kale 8). Waxaa u baahau tahay marka hore in aad tixgaliso laba tijaabooyin oo ku saabsau qeybsanaanta taramaha iyo uqeybsanaante wadarahe/Faraqyada tirooyinka ayadoo ay ku caawinayso hawlgalka 2.2 iyo shaxda 2aad ee Buugga Ardayga.

X) Marka u horeysa, u tilmaan ardayda in ay gartaan in tiro kasta oo a la yidhaa ay u qormi karto tarau tiro kale oo la yidhaa b iyo 100 (sida: a = b × 100) Ama wadarta dhufsanahan oo kale iyo tiro tirsiimo ee C taas oo ka yar 100 (sida: a = b × 100 + c).

Kh) Dabadeed, ka caawi Ardayda si ay u xaqiiqsadaau in tijaabada/xeerka u qeybsanaanta 4 ay ku xidhan tahay u qeybsanaanta loo geeye kasta oo loo geeyo tibaaxda sare 4. Habkani waxaa lagu qorsheeyey hoos.

U qeybsanaanta 4

7324 = 7300 + 24 (marka la kala jajabiyo: loo geeyaha 1^{aad} waa dhufsanaha 100).

= 73 × 100 + 24 (4 waa isirka 100: hadaba 4 waa qeybiye 73 × 100)

Waxaa kale oo aan ognahay in 4 ay tahay qaybiye 24 waayo 24 ÷ 4 = 6.

Haddaba, labada laysu geeyaaba wey u qeybsamaan 4.

Sidaa darted, 4 waa qeybiye 73 × 100 + 24 sidaas darteed wadartu wey u qeybsantaa 4.

Taas macnaheedu waa, 7324 wey u qeybsantaa 4.

Jawaabaha hawlgalka 2.1

Joogtaxa 1^{aad}	Joogtaxa 2^{aad}	Joogtaxa 3^{aad}	Joogtaxa 4^{aad}	Joogtaxa 5^{aad}
1			4	
2		6		
3	6			15
4		12		
5				
6	12			
7			20	
8				
9				
10		30		
18			72	90
26	52			
44		132		

Ardaydu sidoo kale ha ka doodaan Tusaaleyaasha 3 iyo 4 (ee Buugga Ardayga) si ay aad ugu fahmaan.

- U tilmaan Ardyda in tijaabada/xeerka u qeybsanaanta 4 ay ku xidhau tahay tirade ka samaysanta labada go dee ugu dambeyya tirade idil ee lagu siiyey (sida tirade ka samaysanta godadka tobnaadka iyo koowaadka).

- Tijaabada/ xeerka u qeybsanaanta 4 waxaa loo soo dhiraandhiriyey loona dabakahya sida ka muuqata buugga Ardayga. (Fiiri qoraalada ku jira sanduuqyada iyo Tusaalaha 5aad)
- Aqoonta iyo Awooda ayu heleen Ardaydu ilaa iyo hadda tijaabooyinka/xeerarkan qeybsanaanta 4 waxaa lagaga sii dhaadhicin karaa ayadoo ardyda la weydiiyo si'aalo Afka ah inay ka jawaabaan, sida suaasha 3aad ee layliska 2.2 ee buugga Ardyga.
- Tijaabada/xeerka u qeybsanaanta 8 (Xeerka 8aad) waxaa u habayn kara si la mid ah sida tijaabada/xeerka u qeybsanaanta 4 (xeerka 7aad). Ardayda waa in loo diro inay akhiryaan buugtooda si madax banaan. Dhammaadka, baruhu waa in uu sameeyaa is barabar dhig, taas oo caddeynaysa waxay isaga mid yihiin iyo waxay ku kala duwan yiliin labada xeer (u qeybsanaanta 4 iyo u qeybsanaanta 8).
- Aqoonta iyo Awooda ay ardydu u heleen ilaa hadda tijaabooyinka/xeerarka u qeybsanaanta 8 marka hore waa in lagu khasbo ayadoo la weydiinayo Ardayda inay ka jawaabaan su'aalo, Tusaale ahaan, su'aasha 6aad ee layliska 2.2 ee buugga Ardayga si af ahaaneed.
- Laylisyada Buuggaagta kale ee la Akhristo si ay u fahmaan tijaabooyinka/xeerarka u qeybsanaanta 4 iyo 8, si loo hubiyo in tiro idil oo lagu siiyey ay u qeybsanto 4 Ama 8 waa in loo diraa shaqo guri.

Si looga dhigo Aqoonta iyo Awooda ay u leeyiun u qeybsanaanta 4 iyo 8 mid qota – dheer waa in la isficamaalaa su'aalaha 4, 5, 6 iyo 7 ee layliska 2.2 ee Buugga Ardayga.

Jawaabaha layliska Cuttub – hoosaadka 2.1 Jawaabaha layliska 2.1

1. b. 25 way u qeybsantaa 5 waayo godka khaanada koowaadku waa 5; laakiin 25 uma qeybsanto 2 waayo godka khaanada koowaadku waa 5, mana aha tiro dhaban 25 uma qeybsanto 3, waayo wadarta godadkeedu waa 2 + 5 = 7 umana qeybsanto 3.

   t. 30 wey u qeybsantaa 2, 3 iyo 5, waayo khaanada koowaadku waa (0) waana tiro dhaban, wadarta godadkeeduna 3 + 0 = 3 weyna u qeybsantaa 3, god koowaadkeeduna waa 0.

   j. 73 uma qeybsanto 2, 3 iyo 5, waayo godka koowaadku waa (3) mana aha tiro dhaban, wadarta goodadkeedu waa 7 + 3 = 10 umana qeybsauta 3, god koowaadkeeduna waa 3 wuuna ka duwan yahay 0 iyo 5.

   x. 346 wey u qeybsantaa 2, waayo godka koowaadku waa (6) waana tiro dhaban, laakiin 346 uma qeybsanta 3 ama 5 midna waayso, wadarta

godadku waa 3 + 4 + 6 = 13, ta 13 – na waa 1 + 3 = 4 umana qeybsamaan 3, godkeeda koowaadkun a waa (6) wuuna ka duwan yahay 0 iyo 5.

Kh. 1034 wey u qeybsantaa 2, waayo godka koowaadku waa (4) waana tiro dhabau, laakiin 1034 uma qeybsanta 3 iyo 5 midkoodna waayo wadarta godadkeedu waa 1 + 0 + 3 + 4 = 8 umana qeybsamo 3, godkiisa koowaadkuna waa (4) wuuna ka duwan yahay 0 iyo 5.

2. b. 3660 way u qeybsantaa 2, 3 iyo 5 waayo godkeeda koowaadku waa (0) waaua tiro
dhaban, wadarta godadkeeduna waa 3 + 6 + 6 + 0 = 15, ta 15 waa 1 + 5 = 6 labadubana wey u qeybsamaan 3, godkeeda koowaadkuna waa 0.

t. 2670 wey u qeybsautaa 2, 3 iyo 5, waayo khaanada godkeeda koowaadku waa (0) waana tiro dhaban, wadarta godadkeeduna waa 2 = 6 + 7 + 0 = 15, ta 15 – na waa 1 + 5 = 6 labadubana wey u qeybsamaan 3, godkeeda koowaadkuna waa 0.

j. 3998 wey u qeybsantaa 2, waayo khaanada godka koowaadku waa (8) waana dhaban; laakiin 3998 uma qeybsanto 3 iyo 5 waayo, wadarta godadkeedu, 3 + 9 + 9 + 8 = 29 ka 29 – na waa 2 + 9 = 11 umana qeybsamaan 3, godkeeda koowaadkuna waa (8) wuuna ka duwan yahay 0 iyo 5.

x. 49998 wey u qeybsantaa 2 iyo 3, waayo godkeeda koowaadku waa (8) waana dhaban. Wadarta godadkeeduna waa 4 + 9 + 9 + 8 = 30, ta 30 – na waa 3 + 0 = 3 labadubana wey u qeybsamaan 3, laakiin 4998 uma qeybsanta 5 waayo godkeeda koowaadku waa (8) wuuna ka duwan yahay 0 iyo 5

kh. 4815 wey u qeybsantaa 3 iyo 5, waayo, wadarta godadkeedu waa 4 + 8 + 1 + 5 = 18, ta 18na waa 1 + 8 = 9 labadubana wey u qeybsamaan 3; godkeeda koowaadkuna waa 5. Laakiin 4815 uma qeybsanta 2, waayo godkeeda koowaadku waa (5) mana aha dhaban.

d. 1845 wey u qeybsantaa 3 iyo 5, waayo wadarta godadkeedu waa 1 + 8 + 4 + 5 = 18 la 18 – na waa 1 + 8 + 9 labadubana wey u qeybsamaan 3, godkeeda koowaadkuna waa (5), laakiin 1845 uma qeybsanto 2, waayo, godkeeda koowaadku waa (5) mana aha dhaban.

r. 5280 wey u qeybsantaa 2, 3 iyo 5 waayo godkeeda koowaadku waa (0) waana dhaban wadarta godadkeeduno waa 5 + 2 + 8 + 0 = 15, ta 15 – na waa 1 + 5 + 6 labadubana wey u qeybsamaan 3 godkeeda koowaadkuna waa 0.

s. 7275 wey u qeybsantaa 2 ama 5, waayo, wadarta godadkeedu waa 7 + 2 + 7 + 5 = 21, ta 21 – na waa 2 + 1 = 3 labadubana wey u qeybsamaan 3. Godkeeda koowaadkuna waa 5; laakiin 7275 uma qeybsanta 2, waayo, godkeeda koowaadku waa (5) mana aha dhaban.

3. b. haa, waayo 108 wey u qeybsantaa 2 iyo 3 ba

j) $\frac{4}{6}>\frac{7}{12}>\frac{1}{2}>\frac{9}{20}$

10. b) $1\frac{1}{2}+\frac{4}{9}$ marka 1[aad] tirada dhafan u bedel jajab ma qumane.

$1\frac{1}{2}=1+\frac{1}{2}=\frac{2\times1+1}{2}=\frac{3}{2}$

Sidaas darteed $1\frac{1}{2}+\frac{4}{9}=\frac{3}{2}+\frac{4}{9}=\frac{3\times9+4\times2}{2\times9}=\frac{27+8}{18}=\frac{35}{18}$

t) $2+\frac{5}{8}+\frac{7}{8}=\left(2+\frac{5}{8}\right)+\frac{7}{8}$

$=\frac{2\times8+5}{8}+\frac{7}{8}=\frac{21}{8}+\frac{7}{8}=\frac{28}{8}=\frac{14}{4}$

j) $\frac{1}{4}+\frac{1}{3}+\frac{1}{2}=\left(\frac{1}{4}+\frac{1}{3}\right)+\frac{1}{2}$

$\left(\frac{1\times3+4\times1}{4\times3}\right)+\frac{1}{2}=\frac{7}{12}+\frac{1}{2}=\frac{7\times1+1\times6}{12}=\frac{13}{12}$

x) $3\frac{2}{3}-1\frac{3}{4}$ marka hore tirada dhafan u bedel jajab maqumane

$3\frac{2}{3}=3+\frac{2}{3}=\frac{3\times3+2}{3}=\frac{11}{3}$

$1\frac{3}{4}=1+\frac{3}{4}=\frac{4\times1+3}{4}=\frac{7}{4}$

Sidaas darteed $\frac{11}{3}-\frac{7}{4}=\frac{11\times4-3\times7}{3\times4}=\frac{44-21}{12}=\frac{23}{12}$

Kh) $\frac{3}{4}-\frac{1}{4}=\frac{3-1}{4}=\frac{2}{4}=\frac{1}{2}$

d) $\frac{3}{4}-\frac{3}{8}=\frac{3\times8-4\times3}{4\times8}=\frac{24-12}{32}=\frac{12}{32}=\frac{3}{8}$

r) $\frac{7}{10}-\frac{3}{5}=\frac{7\times5-10\times3}{5\times10}=\frac{35-30}{50}=\frac{5}{50}=\frac{1}{10}$

s) $\frac{3}{4}\times\frac{5}{5}=\frac{15}{20}=\frac{3}{4}$

sh) $\frac{7}{6}\times\frac{2}{5}=\frac{7\times2}{6\times5}=\frac{14}{30}=\frac{7}{15}$

dh) $\frac{3}{5}\times\frac{25}{6}=\frac{3\times25}{5\times6}=\frac{75}{30}=\frac{15}{6}=\frac{5}{2}$

c) $\frac{2}{3}\times\frac{6}{5}\times\frac{15}{2}=\frac{2\times6\times15}{3\times5\times2}=\frac{180}{30}=6$

g) 1.27 + 5.063

+1.270
5.063
6.333

f) 4.5 + 1.83

+4.50
1.83
6.33

q) 0.009 + 0.435

+0.009
0.435
0.444

k) 5.063 – 1.27

–5.063
1.270
3.793

l) 4.5 – 1.83

+4.50
1.83
2.67

m) 1 – 0.999

+1.000
0.999
0.001

n) 6.3 × 0.9

talaabada 1aad: $63 \times 9 = 567$

talaabada 2aad: waxaa jira laba god oo ka dambeeya barta jajabtobanlaha sidaas darteed waa inay jiraan taranta laba god oo ka dambeeya barta jajabtobanlaha.

$\therefore 6.3 \times 0.9 = 5.67$

w) 0.04×0.004

talaabada 1aad: $4 \times 4 = 16$

talaabada 2aad: waxaa jira 5 god oo ka dambeeya barta jajabtobanlaha, haddaba waa inay jiraan taranta dhexdeeda 5 god oo ka dambeeya barta jajabtobanlaha sidaas darteed, $0.04 \times 0.004 = 0.000166$.

h) $0.4 \times 0.3 \times 0.028 = (0.4 \times 0.3) \times 0.028$

$= (0.12) \times (0.028) = 0.00336$

11. b)

$3\frac{1}{2}$	6	$5\frac{1}{2}$
7	5	3
$4\frac{1}{2}$	4	$6\frac{1}{2}$

Dhammaystirka jog u taxyada iyo jiif u taxyada iyo xagala – gooyayaasha oo ay dhammaantoodu wadartooda tahay isku mid.

Aan u qaadano tix raac xagal – gooyaha buuxa wadartiisuna tahay 15.

i. Joog u taxa midig

$L + 3 + 6\frac{1}{2} = 15$

$L + 9\frac{1}{2} = 15$

$L = 15 - 9\frac{1}{2}$

$L = 5\frac{1}{2}$

ii. Jiif u taxa sare

$3\frac{1}{2} + k\,5\frac{1}{2} = 15$

$9 + k = 15$

$k = 15 - 9$

$k = 6$

iii. Joog u taxa dhexe

$6 + J + w = 15$

$11 + w = 15$

$w = 15 - 11$

$w = 4$

iv. Jiif u taxa hoose

$n + 4\ 6\frac{1}{2} = 15$

$n + 10\frac{1}{2} = 15$

$n = 15 - 10\frac{1}{2}$

$n = 4\frac{1}{2}$

v. Jiif u taxa dhexe

$m + 5 + 3 = 15$

$m + 8 = 15$

$m = 15 - 8$

$m = 7$

CUTTUB 4 ABYOONAYAASHA

HORDHAC

Abyoonayaashu waa tirooyinka ugu horeeya ee uu qofkastaaba uu u barto in uu u isticmaalo isticmaalkooda, maalin kasta la isticmaalo darteed. Abyoonayaashu waxay ka samaysan yihiin kooxo, kuwaas oo tirooyin kale laga soo dhiraan-dhiriyay.

Ujeedada cutubkani waa in la fahmo waxaan u jeedno maarkaan leenahay abyoonayaasha, tirooyinka Togan iyo kuwa Taban, tiro kasoo horjeedkeeda xariiqda tirada iyo calaamadaha sida qaar ka mid ah cutubyadii hore, tani waa markii u horaysay ee ay noqotay in ardayda la baro wax ku saabsan ka soo horjeedka tiro (rogaal) iyo tirooyinka calaamadaha wata sida tirooyinka togan iyo taban. Sidaas darteed dadaal iyo taxadar gaar ah oo ay la socdaan laylisyo lagu cel-celiyo waa in la sameeyo sidaas daraadeed ardaydu waxay u yeelan doonaan abyoonayaasha aas-aas fiican.

Cutubkanisidoo kale waxaa loo diyaariyay ardayda in fikradaha sida tirooyinka calaamadaha wata (sida tirooyinka taban iyo kuwa togan) uu siiyo ayadoo laga bilaabayo ta ugu yar ilaa ta ugu wayn, ayada oo laga bilaabaya ta ugu wayn ilaa ta ugu yar, iyada oo la isticmaalayo xariiqda tirada iyo iyada oo la siticmaalayaba ardayda sidoo kale waa in laga caawiyo siday u garan lahaayeen sida la isku bar-bardhigo, laba abyoone iyo sida la iskugu geeyo iyo sida loo kala gooyo Abyoonayaasha kuwa isku midka ah iyo kuwa aan isku midka ahaynba.

Waxaa kale oo loo baahan yahay in arday kasta laga caawiyo, lagu dhiiri galiyo sidii uu fikradaha Abyoonayaasha iyo xaaladaha nolosha dhabta ah uu iskula xidhiidhin lahaa.

UJeedooyinka Cutubka

Cutubkani marka uu dhamaado dabadeed ardaydu waxa ay awoodi doonaan inay:-

- *Qeexaan ururka Abyoonayaasha*
- *Ay sifiican u cadeeyaan faraqa u dhexeeya ururka tirooyinka tirsiimo, ururka tirooyinka idil iyo ururka Abyoonayaasha.*

- *Qeexaan tirooyinka taban iyo kuwa togan*
- *Isu geeyaan laba abyooneyaal, kana gooyaan hal abyoone ku kale*
- *Ku muujiyaan abyoone kasta xariiqda tirada dusheeda*
- *Isticmaalaan xariiqda tirada si ay isugu geeyaan una kala gooyaan Abyoonayaasha.*
- *U qoraan Abyoonayaasha sida ay u kala horeeyaan iyagoo ka bilaabaya ka u yar ilaa ka u wayn iyo iyaga oo ka bilaabaya ka u wayn ilaa ta u yar, iyada oo la isticmaalayo xariiqda tirada iyo iyada aan la isticmaalaynba.*
- *Isbarbardhigaan laba ama in ka badan oo Abyoonayaal ah.*

4.1 BARASHADA ABYOONAYAASHA

Mudada loo qoondeeyay: 5 xiisadoo

Waxa laga rabo ardayga

Marka uu dhamaado cutub hoosaadka 4.1 Ardaydu waxa ay awoodi doonaan inay:

- *sharaxaan waxa uu yahay macnaha abyoonayaal*
- *ay isla xidhiidhiyaan (ku dabaqaan) fikradaha abyoonayaasha iyo nolol maalmeedkooda.*

Erayo Muhiimka ah

- Abyoonayaal, summadda Tognaanta (+), Summadda Tabnaanta (-), lidka tiro abyoon.

Hordhac

Intaynaan sharaxin qeexin macnaha Abyoonayaasha (qeexida 1 ee ku taala bogga 3 ee buuga ardayga) ka hor ardayda waxaad siin kartaa tusaalayaal la yaqaano oo ah siin iyo ka qaadid, macaash iyo khasaare, ka sareeya iyo ka hooseeya IWM. Sidoo kale waxaad siin tusaalayaalkale kuwaas oo la mid ah kuwa ku yaala (lagu siiyay buuga ardayga bogga 90^{aad}.

Gudbinta Cashirka

Ardayda waxaa laga filayaa inay fikrado ka haystaan ururka tirooyinka tirsiimo iyo ururka tirooyinka idil, ardaydaada waxaad ku boorinkartaa inay ka doodaan

- Tirooyinka tirsiimo iyo
- Muhiimada eber

Dabadeed waxaad bilaabi kartaa inaad barto Abyoonayaasha adigoo siinaya masalooyin la xidhiidha nolosha, waxaa kale oo aad siin kartaa tusaalayaasha lagugu siiyay booga 3 ee buuga ardayga. Sidoo kale waxaad isitcmaali kartaa tusaalayaasha noocyada soo socda:

Tusaalaha 1aad

Magacaw saadesx xaaladood oo nolosha la xidhiidha, taas oo Abyoonayaasha loo isticmaali karo

- Isticmaalida (kharasha) iyo qaadashada lacageed
- Kor u kicida iyo hoos u dhaca heer kulka
- Kordhinta hoos u dhaca dhibcaha tijaabada ah ka caawi ardaydaada inay keenaan tusaalayaal la xidhiidha xaaladaha Nolosha.

Tusaalaha 2aad

Abyoone ahaan side loogu qori karaa mid kasta oo ka mid ah kuwan soo socda?

- 16
- –55
- –283
- 250

Jawaabaha Layliska 4.1

b) 2 t) 0 j) maya

x) soo amaaho laba Birr oo kale

Jawaabaha hawlgalka 4.2

1.

Xaalada	Tiro ahaan
10 darajo ka saraysa eber	+10
Khasaare 10 birr ah	–10
7 dhibcood oo kor loo kaco	
3 talabo oo dib loo socdo	–3

2. Saacadu markay ahayd 5:00 Aroornimo heerkulku wuxuu ahaa –40℃. 9:30 am markay ahaydna heerkulku wuxuu ahaa + 11℃.

Jawaabaha shaqo kooxeedka 4.1

1. b) Heerkulka duhurka iyo ka-habeen bedkhka, keydsasho iyo kala-bixid lacageed, xagga hore oo loosocdo iyo xagga dambe oo loo noqdo, khasaare iyo faa'iido ganacsi iwm.
2. 15, –44, –9, 53, –88, –17, 37
3. 

Jawaabaha layliska 4.1

1. b) + 210 fuudh t) –162 mitir j) –12℃
   x) –100 Birr kh) +10 dhibcood d) –150 Birr
   r) +100Birr
2. b) –161 t) –73 j) –36℃ x) 0
   kh) +12℃ d) +16

4.2 ISBAR-BAR DHIGA IYO SIDA AY U KALA HOREEYAAN U QORIDA ABYOONAYAASHA

Mudada lii qoondeeyay: 5 xiidsadoo

Waxa laga rabo ardayga

Cutub hoosaadkan 4.2 marka uu dhamaado kadib ardaydu waxay awoodi doonaan in ay:-

- *qeexaan waxa uu yahay xariiqda tiradu*
- *u qoraan sida ay u kala horeeyaan iyo inay isbarbar dhigaan abyoonayaasha iyagoo isticmaalaya xariiqda tirada iyo iyagoon isticmaalaynba.*
- *caddeeyaan abyoone tirada ka horaysa iyo tirada ka dambaysa.*

Erayo Cusub

- Xariiq tiro, isbar-bar shig, siday u kala horeeyaan u qorid, tirooyin taban, tirooyin togan, ka horeeye iyo ka dambeeye(lagu xige iyo ku xige)

1. Xariiqda tirada waxaad ku bilaabi kartaa hadalkaaga ku bilaabi kartaa ururka tirooyinka tirsiimo iyo ururka tirooyinka idil (kaas oo ah ururka tirooyinka tirsiimo iyo eber) dabadeedna ka hadal kuwa lidka ku ah. Tirooyinkan dabadeedna sawir xariiq jiifta oo laba cidhif sida leebka ah(si ay inoogu sheegto in aanay labada cidhif midkoodna u dhamaanayn) una sheeg ardaydaada in ay tani ahayn xariiq la iska sameeyay eebalse ay tahay xariiq aan ku dul qori doono tirooyin si ay ugu taagnaato ururka Abyoonayaasha. Qiyaas bar badhtanka xariiqda, kuna qor bar si ay ugu taagnaato eber dhinaca midigta ka xigta eber ku qor, tirooyinkii tirsiimo siday isugu xigeen adigoo ka bilaabaya kow, una dhaxaysiinaya laba tiro tirsiimo fogaan isleeg, maxaa yeelay tirooyinka idili waxay ka bilaabmaan eber waxaana loo tiring xagga midigta, u sheeg ardaydaada in ay ku waasi yihiin Abyoonayaasha togan, Abyoonayaasha tabanina waxay ka bilaabmaan eber waxaana loo tiring dhinaca bidixda.

Tusaalaha 2aad

Sabuurada dusheeda ku qor -6, -2, 3, 0, -5, waydiina ardaydu in ay ku muujinyaan xariiqda tirada dusheeda, caawi ardayda adigoo u sheegaya in Abyoonyaasha togan ay lagamamaarmaan tahay in lagu qoro dhinaca midigta ka xiga eber, halka abyoonayaasha taban in lagu qoro bidixda ka xiga eber, sidoo kale u sheeg ardayda marka tirooyinka togan ay waynaadaan inay kordhayso. Halka marka tirooyinka tabani marka ay waynaadaan tiro ahaan ay hoos u dhacayso.

Isbabar- dhiga iyo siday iskugu xigaan, u qorida abyoonayaasha waxaad ku bilaabi kartaa doodaada adigoo u sheegaya ardayda in aad isticmaalno tiro wayn oo togan, in macnaheedu yahay qiimo wayn tirade markay waynaataba, markay badataba ama kor u kacdaba ama fogaataba, ama qaali noqotaba, ama tiro kasta oo u taaganba.

Laakiin marka ay xaaladu tahay tiro taban u sheeg ardaydaada in ay xusuustaan markasta oo ay tiradu waynaato in tiradu yaraanayso, waxaad siin kartaa tusaalayaal la xidhiidha nolosha dhabta ah oo la mid ah kuwa ku qoran bogga 9 ee buugga ardayga. Waxaa kale oo aad siin kartaa nooca tusaalahan soo socda oo kale.

Tusaalaha 2aad

Isbar-bar dhig tirooyinka -4 iyo -2, sida kor ku xusan tirada wadata calaamada laga jaray waxaa lagu qori dhinaca bidixda ka xigta eber, tirada aan calaamadi ka muuqan waxaan u qaadan doona inuu togan yahay waxaa lagu qori dhinaca midigta ka xiga eber. Si la isku barbar dhigo laba ama in ka badan oo Abyoonayaal ardaydu waa in ay yaqaanaan in tirada ugu fog ee dhinaca midigta ee eber ay tahay ta ugu wayn, tirada ugu fod dhinaca bidixdana ee eberka ay tahay ta ugu yar.

Hadda ardaydaada waxaad waydiin kartaa labada tiro ee lagu siiyay xariiqda dusheeda ayna sheegaan mid ka wayn.

Jawaabaha Hawlgalka 4.3

1. b. -5, -3, 0



t. -7, -2, 1



j. -8, -3, 0



x. 0, 2, 4



kh. -55, -5, 5



d. -3, -2, -1



2. b. 7, 1, -3



t. 9, 0, -9



j. 12, 2, -2



x. -7, -8, -9



kh. 5, 4, -4



d. 1, -1, -10



Jawaabaha hawlgalka 4.4

Meere	Celceliska heerkulka
Fiinas	453° C
Meerkuri	179° C
Dhulka	8° C
Maaris	-37° C
jubitar	–150° C
Saturn	-185° C
Yuraanas	-214° C
Nebtuun	-225° C
Buluuto	-236° C

Jawaabaha layliska 4.2

1. 

2. b. -16 t. 7 j. 31 x. -18
3. b. -12, -11, -9, 0, 8, 12, 15 t. -13, -12, -7, -5, 0, 4, 6, 17
   j. -33, -31, -30, -28, 3, 27
4. b. 22, 21, 16, 14, 0, -8, -21 t. 24, 14, 10, 0, -14, -20, -22
   j. 11, 10, 9, -1, -9, -13, -19

4.3 ISUGAYNTA IYO KALA GOYNTA ABYOONAYAASHA

Waxa laga rabo ardayga

Dhammaadka cutub hoosaadkan 4.3 ardaydu waxay awoodi doonaan in ay:

- *helaan wadarta laba abyoonayaal iyagoo isticmaalaya xariiqda tirada iyo iyagoon isticmaalaynba.*
- *qeexaan asal ma-doorshaha iyo rogaalka isku gaynta ee abyoonayaasha.*

Erayo Cusub

- Isu gayn, kala goyn, wadar, faraq, asal ma-doorshaha isu gaynta, Rogaalka isu gaynta.

Waxaad ku bilaabi kartaa cutub hoosaadkan adigoo ardaydaasi si gacan ka qabasho ah inay u sheegaan faraqa u dhexeeya "calaamadaha isu gaynta " iyo "calaamdaha tognida" iyo sidoo kale faraqa u dhexeeya calaamada "laga jaray" iyo calaamada "Tabnida" waxaa kale oo aad ka doodi kartaa xeerarka laba tiro oo isku calaamda ah iyo xeerarka laba tiro oo calaamda kala duwan wata, si noocyada tusaalayaashan soo socda si ay ugu bartaan si gacan ka qabad ah isugaynta.

Tusaalaha 1aad

Raadi wadarta mid kasta oo kuwan soo socda ka mid ah:

b) (+ 5) + (+2) = 5+2 = 7

t) (+4) + (-3) = 4-3 = 1

j) (-6) + (+8) = -6+8= 2

Sidan si la mid ah ugu dooda xeerarka raadinta faraqa laba tiro oo leh calaamado isku mid ah iyo isku gaynta labo tiro oo leh calaamado kala duwan, marka labaad waxaad siin kartaa noocyada tusaalayaasha soo socda si ay gacan ka qabasho ugu sameeyaan kala goynta.

Tusaalaha 2aad

Raadi mid kasta oo ka mid ah kuwan soo socda:

b) (+6) –(+2) = 6-2 =4 t) (+7) –(-3) =7+3 =10

j) (-3) – (+4)= -3-4=-7 x) (-2) –(-7) = -2+7=5

Ardaydu waa in ay xusuustaan in marka ay isu geeyaan ay tiriyaan dabadeed waxay heli in ka badan, marka ay kala jaraana dib ha u tiriyaan waxay helayaan tiro yar, waxaa kale oo loo baahan yahay in ay xusuustaan in marka ay isticmaalayaan xariiqda tirada qiimaha tiradu wuu waynaan marka uu u socdo dhinaca midigta,

Qiimaha tiradu wuu yaraan marka ay u socdaan dhinaca bidixda.



Jawaabaha Hawlgalka 4.5

1. Maadaama oo aad haysato 35birr kaliya laakiin aad u baahan tahay 63birr si aad ugu iibsato buug waxaad u baahan tahay lacag kale, haddaba lacagta aad u baahan tahay waxaa lagu soo saari 63 – 35, dabadeed waxaad u baahan tahay 28birr.
2. 73 -44 =29.

3. Faraqa u dhexeeya heerkulka sare iyo heerkulka hoose waxaa lagu xisaabin karaa wadarta labada qiime ee 27 iyo 8 kuwaaso noqon doona 35, ogow in taasi ahayd xaalada marka aan xisaabino foganta sare (qotonka) ee u dhaxaysa buurta ras dhaashen iyo Danakil caddadiskoodo.

Jawaabaha hawlgaka 4.6

1. b) 0 t) 3 j) –3

Dabadeed marka aad ardayda ku dhiiri galisid in ay ka qayb qaataan dooda muxuu noqon doonaa maxsuulku marka eber loo geeyo Abyoone kasta, qeexna in eber yahay asal ma doorshaha isu gaynta. Dabadeedna sidaasi si la mid ah in ay raadiyaan wadarta laba abyoone oo isku lid ah, sii nooca tusaalayaashan soo socda oo kale.

Tusaalaha 3aad

Raadi wadarta mid kasta oo ka mid ah kuwan soo socda.

b) (+3) + (-3)=3-3 =0 t) (-5) + (+5) = -5+5 =0
j) 0+0 = 0

Doodan xagga sare ku xusan kadib qeex rogaalka isku gaynta Abyoonayaasha. Haddaba ardayda waydii inay sharaxaan isku mid ahaan shahan labadan tibaaxood a-b iyo a+ (-b), sii tusaalayaal kala duwan si aad u tusto a-b iyo a+(-b) inay leedahay fur-furis isku mid ah.

Tusaalaha 4aad

Raadi wadarta iyo faraqa mid kasta oo ka mid ah kuwan soo socda:

b) 6-3 t) 6+ (-3) j) (-4) – (-6) x) (-4) + 6

Sidoo kale ardaydu haka doodaan isku mid ahaanshaha labadan tibaaxood ee soo socda; a –(-b) iyo a+b, mar labaad sii tusaalayaal kala duwan si aad u tusto a- (-b) iyo a+b inay ina siiyaan maxsuul isku mid ah.

Tusaalaha 5aad

Raadi wadarta iyo faraqa mid kasta oo ka mid ah kuwan soo socda;

b) 8-(-2) t) 8+2 j) (-3) – (-4) x) (-3) + 4

Jawaabaha layiska 4.3

1. b. 8, 4, 0, –3, –4, –9 t. 6, 2, 1, 0, –3, –5, –7, –11
   J. 12, 8, 6, 3, –3, –5, –8 x. 10, 7, 2, 0, –3, –5, –6, –7
2. b. 6 t. 12 j. 0 x. -3 kh. -14 d. -7
3. b. 9 t. -9 j. -8 x. 9 kh. -9 d. -7

4. b. 2, 4 t. -10, -8 j. 18, 20 x. -2, 0 kh. -11, -9 d. -1, 1

5. b. < t. > j. > x. < kh. = d. >
r. > s. > sh. >

6. b. -35 t. 9 j. -24 x. -16 kh. -3 d. 48

7. b. < t. < j. < x. > kh. <

Jawaabaha layliska nakhhtiinka cuttubka 4aa

1. 31℃
2. (–137) + (–91) = –228 mitir
3. 33 – 15 = 18
4.

Xaalad	Qiimaha tirada
9 darajo ka sareeya eber	+9
54 mitir ka sareeya heerka badan	+54
12 halbeeg oo loosocdo dhinac bidix ee xariiqda tirada	–12
Keyd lacag dhen 860 birr oo la dhigto Bangi	+860
Macahs dhan 45 birr	+45
Lidka 181	–181
8 helbeeg oo bodix looga socdo xariiqda tirada barta 1	–7

5. –14, –91, 65, –3, 12, 0, 23
6. b. –85, –43, –37, 16, 34, 36, 58
   t. –29, –27, –22, –10, –4, 0, 16, 19, 29
   j. –41, –22, –18, –14, –8, 12, 16, 20
   x. –53, –35, –31, –13, 41, 46, 48
7. b. 77, 33, 15, 11, –11, –19, –27, –41
   t. 72, 46, 42, 29, –1, –4, –13, –43
   j. 81, 31, 26, –5, –17, –63, –69
   x. 61, 55, 53, 40, 33, 9, –34, –45, –56
8. 8 – 11 = –3℃
9. b. 42 t. 41 j. –27
   x. –91 kh. 9 d. 58
10. b. –71 t. 30 j. 45
    x. –113 kh. 17 d. –50
11. b. 15 t. 8 j. –31
    x. 20 kh. 42 d. 55
12. b. < t. < j. < x. > kh. > d. =
13. b. 86 t. 18
14. b 509 + 476 = 985 sannadood

CUTTUB 5 ISLE'EGYADA TOOSAN, DHEELLIYADA XARIIQDA TOOSAN IYO SAAMIYADA

HORDHAC

Cuttubkani waxuuu muhimada saarayaa dooda ku sabsan fikradaha aasaasiga ah ee isle'egyada toosan, dheelliyada toosan kulamada iyo saamigalka qeyb hoosaad kasta waxaa jira hawlgallo, shaqo kooxeed iyo laylisyo. Dhammaadka cutubkan, waxaa jira laylis Nakhtiin ah laylis yadan tiro ahaan wey yar-yihiin, laakiin waxaa loo isticmaali karaa in lagu qiimeeyo. Aqoonta Ardayda iyo heerka fahankooda.

Ujeedooyinka cutubka

Marka cuttubku dhammaado dabadeed, Ardaydu waa inay awoodaan inay:

- *Horumariyaan xirfadahooda ay ku xalliyaan furfuraan isle'egyada toosan iyo dheeliyada toosan (ee qaabka $x + b = t$, $x + b > t$).*
- *Fahmaan macnaha saamigal quman iyo saamigal rogaal ah, kuna muujiyaan garaaf ahaan (sawir ahaan).*

5.1 FURFURISTA ISLE'EGYADA IYO DHEELIYADA TOOSAN EE FUDUD

Xiisadaha loo qoondeeyey: 7 xiisadood

Waxa laga raba Ardayga

Dhammaadka cuttub-hoosaadkan, ardaydu waa inay awoodaan inay:

- *hal-taLaabo horey u qaadaan furturista isleegyada toosan ee saansaantoodu tahay* $x + b = t$.
- *hal-talaabo horey u qaadaan furfurista dheeliyada toosan ee saansaantoodu yahay* $x + b > t$.

Eryao cusub

Isle'egta xariiqda toosan, dheelliga xariiqda toosan, horaadka doorsoomaha, ururka furfurista, isle'egyo isku-dhigma.

Hordhac

Qaybtan waxan ku soo baranay fasalkii 5^{aad} ee xisaabta. Sidaa darted heerkan ardaydu waxay u baahan yihiin inay guda-galaan fikradihii ay ku soo barteen fasalka 5^{aad} cuttub-hoosaadkan waxaa loo sii qeybiyaa laba cinwaan oo waaweyn. Furfurista isle'egyada toosan oohal-talaabo horey loo qaado waa qeybta koowaad iyo furfurista dheeliyada toosan oo hal-talaabo horey loo qaado oo ah qeybta labaad.

5.1.1 Furturista isle'egyada toosan oo hal-talaabo hore loo qaado

Casharkan is aad u bilowdo, ardayda u kooxee sidaad doonto, weydiina inay ka shaqeeyaan shaqo kooxeedka 5.1 ee lagugu siiyey buugga Ardayda ku boori ardayda, caawina si ay u helaan jawaabta su'aasha. Shaqo kooxeedkani wuxuu kaa caawin in aad dardar ama dareenkooda kiciso, siina Ardayda jaanis ama fursad ay ku xasuustaan (dib-ugu laabtaan) macnaha "jiritaan ka ku xidhnaanshaha horaadka furfurista doorsoomaha".

Jawaabaha Hawlgalka 5.1

1. b. Doorsoome waa xaraf ama summad u taagan hal ama in kabadan oo tirooyin ah.
   t. Isle'eg waa weedh laba-tibaaxood oo xisaabeed ay isku mid yihiin (ayna dhaxayso calaamada =)

j. Isle'egyo isku-dhigma: isle'egyada leh furfuris (xal) isku mid ah.

x. Isle'egta xariiqda toosan: waa isle'egta ay tibxaheeda ay ku jiraan doorsoomeyaal jibaarkoodu yahay hal-digirii (derejo) furfurista isle'egyada toosan ee x ee hal-talaabo lagu helaa waa isle'egyada leh saansaanta (qaabka) $x + b = t$, $b, t \in Q$.

kh. Horaadka Doorsoomaha: waa ururka kutirsaneyaashiisa loo qaato inay yihiin kuwa suurtogelka ah ee lagu beeleli karo Doorsoomaha ku jira xidhiidhka lagu siiyay.

d. Ururka furfurista: waa ururka ka kooban dhommaan furfurista (xalka) weedho furan. Sida: isle'eg ama dheelli.

2. b. {2} t. $\varnothing$ j. {2} x. {0} kh. {10} d. {1}

Qiimeyn

b. Ardayda u sharax macnayaasha, Raalligalin Furfurid ururka furfurista, si aad u xoojiso fahankooda u dir Layliska 5.1 iyo layliska 5.2 fasalka dhexdiisa.

Jawaabaha layliska 5.1

1. Weedhaha lagu siiyey waxay run yihiin haddi x ay la mid tahay oo kaliya

b. $\frac{3}{4}$ t. –5 j. 0.4 x. 0.4 kh. 6

Markaad ka doodaan su'aasha 2, waa inaad ardayda ka caawiso sidii ay uga doodi lahaayeen sherciyada qaab-bedelida "loo geeyo ama laga-gooyo tiro isku midah labada dhinac waxba iskama badalayaan isle'ekaantoodu" sida:

Haddi $b = t$, dabadeed $b + j = t + j$, marka $b, t, j \in Q$.

Intaa waxa dheer, in aanaad ka boodin in aad sheegta in isle'egyada isku-dhigmaa aanay hal ahayn hadda aan qaadano tusaale waxay ku xidhan tahay kala duwanaansha shakhsiyaadka.

2. b. $x - \frac{1}{2} = -\frac{7}{2}$

$x - \frac{1}{2} + \frac{1}{2} = -\frac{7}{2} + \frac{1}{2}$ (u gee $\frac{1}{2}$ dhinac kasta) $= -3$

Ama $x - \frac{1}{2} = -\frac{7}{2}$

$x - \frac{1}{2} - \frac{1}{2} = -\frac{7}{2} - \frac{1}{2}$ (ka goo $\frac{1}{2}$ dhinac kasta)

Sidaas darted, x = –3, $x-\frac{1}{2}=-\frac{7}{2}$ iyo $x-1=-4$

Waa isle'eg u dhiganta.

Ayadoo la isticmaalayo xeelad la midah.

t. $-x-3=4.5$, $x=-7.5$ iyo $-x+1=8.5$ wey isku-dhigmaan.

j. $y+\frac{3}{2}=-2, y=-\frac{7}{2}$ iyo $y-\frac{1}{2}=-4$ wey isku-dhigmaan.

x. $x=9$, $x-1=8$ iyo $x+3=12$ wey isku-dhigmaan.

3. b. ∅ t. {14} j. {0} x. {4} kh. ∅ d. ∅

4. –6

5.1.2 Furfurista hal-talaabo ka dib ee dheelliyada xariiqda toosan

Si aad u bilowdo qeybtan, waxaad weydiin kartaa su'aalo aad ugu kuur-galayso inaad ku qiimeyso heerkooda fahan ee dheelligii fasalkoodii 5^{aad} ee xisaabta. Isku day in aad u soo jeediso casharka si ugu suurta-galsan ee ugu fudud.

Jawaabaha hawlgalka 5.3

1.	b.	isle'eg	t.	dheeli	j.	dheelli
	x.	isle'eg	kh.	dheelli	d.	dheelli
2.	b.	been	t.	run	j.	run
	x.	run	kh.	run	d.	run

Qiimeyn

Markasta ka fikir waxa ugu yar ee ardayda looga baahan yahay inay barteen, taas oo laga rajaynayo ama la filayo ardayda marka qeybtani dhammaato

Isticmaal habab qiimeyneed oo kala duwan mid caadi ah iyo si aan caadi ahayn si aadu hesho jawaabcelin ku saabsan heerka fahamkood ee cinwaankan. Intaa ka dib shakshiyaadka ardayda ah caawi xilliga casharku socod.

Jawaabaha layliska 5.2

1. b. ∅ t. ℕ j. {1, 2, 3, 4, 5, 6, 7, 8} x. {–2, –1, 0, . . .}

2. b. {0} t) {1, 2, 3} j. {–5, –4, –3, . . .}
   x. ma laha xalin

3. b. ma'laha furfuris ama xalin
   t. waxay leedahay furfurista {4, 5, . . .}
   j. furfuristoodu waa tirooyinka tirsiimo
   x. malaha furfuris (xal)

4. i. b. {–5, –3, 0, 2} t. {–5, –3, 0, 2, 4}
   j. {–5, –3} x. {–5, –3, 0}

   ii. b. {0, 1, 2, 3} t. {0, 1, 2, 3, 4} j. ∅ x. {0}

5.2 KULANNADA

Xiisadaha looqoondeeyey: 6 xiisadood

Waxa laga rabo Ardayga

Dhammaadka cuttubka hoosaadkan, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:

- *go'aamiyaan kulamada bar ku taala waaxda koowaad*
- *ku muujiyaan bar kulamadeeda lagu siiyey waaxda koowaad.*

Erayo cusub

Dhidib, waax, sallax, lammaane horsan, kullan, dhidibka-x, dhidika-y

Hordhac

Cinwaan hoosaadkan waxaa ku baran doonaa habka kullamada (dhidibada kaartis). Macnayaasha qeybtan intooda badani Ardayda wey ku cusub yihiin. Sidaas darted waxa lagama maarmaan ah inaad hubiso in ardaydaada maskaxdooda ay si fiican u gashay macnaha ciwaaukani. Tusaale ahaan sida loo akhriyo macluumaadka, sida loogu muujiyo xidhiidhka qaab (saasaan) lammaaneyaal horsan ah.

Gudbinta casharka

Cuttub-hoosaadkan ardaydu waxay ka doodi doonaan kulamada ku dhacda waaxda koowaad iyo sida loogu muujiyo bar lagu siiyey kulamadeed sallaxa dhidibada-xy waqtiga intiisa badan, halkaad toos qeex xisaabeedka u bilaabi lahayd; waxa lagugula talinlahaa in aad ka bilowdo hawlgalka aanad ka doodaan muuqaal ahaan.

Jawaabaha hawlgalka 5.3

b.



t. mid j. 90° x. Afar

Jawaabaha hawlgalak 5.4

A (1, 7), B (2, 5), C (3, 6)

Markay dhammeeyaan shaqada hawlgalka, ardayda waxa laga yaabaa inay wax ka fahmaan xariiqyada isku-qotoma.

Barta kulanka (halka ay iska-jaraan) iyo Gobolada (waaxaha) dabadeedna waa inaad u gudubtaa barahan soo socda si aad uga doodaan. Ka soo qaad in OX iyo OY ay iska jaraan barta O.

1. OX waxaa la yidhaa dhibibka – x
2. OY waxaa la yidhaa dhidibka – Y
3. Marka labaduba laysku daro waxaa la dhahaa dhidibada laydiyeed, ama dhidibada=a kulanka.
4. Barta ay ska-jaraan O waxaa la dhahaa bar-biloga (xudun), aan qaadano in P tahay bar ku taala sallaxa dhidibada dusheeda xariiq P ka Timaada oo la yidhaa $\overline{PM} \perp \overline{OX}$ sawir, dabadeed,
   b. OM waxaa la dhahaa dhidibka-x ama abshisa P waxaano loo Qoraa X
   t. MP waxaa la dhahaa dhibibka-y ama ordhineed P waxaana loo qoraa Y.
   j. Tirooyinka X iyo Y waxaa la dhahaa kulamada P
   x. Summada P (x, y) waxaa loo isticmaala si loogu magacaabo barta P.

Qiimeyn

Waxaad ku qiimeyn kartaa

Adigoo siinaya layliska 5.3 su'aalaha 1, 2, 3, 4 shaqo fasal ahaan halka inta hadhay layliska aad ugu diri karto shaqo guri ahaan. Sida ugu suurto-galsan waa inaad u

raadiso su'aalo kale oo aankuwa buuga ahayn oo la midah iyo masalooyin aad ka raadiso buuggaagta kaleed kaga doodaan fasalka dhexdiisa.

Jawaabaha layliska 5.3

1. (0, 0) 2. 0 3. 0
4. A – dhidibka-x iyo dhidibka-y labadab
   B – dhidibka – y
   C – dhidibka – x



5. A(2, 2), B(5, 0), C(0, 3), D(1, 3)

5.3 SAAMIGALKA

Xiisadaha loo qoondeeyey: 12 xiisadood

Waxa ardayda laga rabo

Cinwaankani marka uu dhammaado, ardaydu waa inay awoodaan inay:

- *Sharaxaan saamiygalka quman iyo madoorsomaha saamigalka*
- *Go'aamiyaan madoorsoomaha (Isirka) saamigalka quman*
- *Ku dabakhaan aqoontooda saamigalka quman si ay u furfuran masalooyinka*
- *Sharaxaan saamigalka rogaal iyo madoorsoomaha (isirka) saamigalka.*
- *Go'aanshaan madoorsoomaha saamigalka rogaalka ah.*
- *Ku dabakhaan aqontooda saamigalka rogaalka si ay u xalliyaan masalooyinka.*

Erayo cusub

Saamigal, Saamigal quman, Saamigal rogaal ah, madoorsoomaha (Isirka) saamigalka

Hordhac

Cuttuub-hoosaadkani wuxuu muhimada saarayaa doodaha ku saabsan saamigalka quman, saamigalka. Rogaalka ah iyo Isirka saamigalka.

Tilmaan barahani wuxuu kuu sheegayaa waxyaalo ku saabsan hababka aad isticmaali lahyd si aad u gudbiso casharka, Intee ayaan xoogga saarnay, inteese u baahan in xoogga la saaro, haadaad habka casharka aad u gubinayso ka dhigta mid ardaydu ka qeybgalayaan, waxaad heli doontaa waqti kugu filan oo aad ku dhammayso cuttubka.

Gudbinta casharka

Cutub-hoosaadkan ardaydu waxay ka doodi doonaan saamigal iyo saamigal rogaal ah ayadoo sawir lagu muujin saamigalka quman iyo saamigal ka rogaalka ahna waa lagaga doodi doonaa.

5.3.1 Saamigalka quman

Waxaad casharka ku bilaabi kartaa adigoo ardayda weydiinaya inayka shaqeeyaan shaqo kooxeeda 5.2 shaqo kooxeedani ardayda waxay ka caawin doontaa inay naf-ahaandtoodu isu diyaariyaan dooda hadhow.

Dooda dhexdooda waa inaad Huubisaa in ardaydu barteen (la qabsadeen) Gabagabooy inkan soo socda ee muhiimka ah.

1. Qiimeyaasha x iyo y midba midka kale ayuu ku xidhan yahay, taasi waxay tahay qiimeyaashoodu hoos ayey u wada dhacaan si wada jirta ama kor ayey u kacaan si wad jirta.
2. Saamiga $\frac{y}{x}$ ama $\frac{x}{y}$, ee u dhexeeya qiimeyaasha isu-beegani isma badalo.

Jawaabaha hawlgalka 5.5

1. Haa
2. (a) xidhiidh joogto ah oo ah $\frac{1}{5}$
   (b) xidhiidh joogto ah oo ah 3.
3. wuu kordhayaa
4. hoos ayuu u dhacayaa (yaraanayaa).

Qiimeyn

Si aad u adkaysid (ay aad ugu fahmaan) macneyaasha ku muujisan (ama ku qoran) qeybtan, waxaa fiican in aad tusto (u sheraxdo) tusaaleyaal Fasalka dhexdiisa, waxaa kale oo aad siin kartaa masalooyin iyo su'aalo aad ka soo saarto buugta kale

ee xisaabta ah, waxa kale oo aad siin kartaa shaqo guri ku dhiiri gali ardayda inay ku mujiyaan fikradaha saamigal qaman sawir ahaan.

Jawaabaha shaqo kooxeedka 5.2

b. haa

t. $y = 3x$

j



.

d. xariiq toosan oo marta barta bilowga (xuduunta)

r. haa

Jawaabaha layliska 5.4

1. b iyo j ma'aha saamigal quman waayo ma jiro ma-doorsoomihii saamigalku.
2. Adigoo ka duuwlaya qiimaha x iyo y ee lagu siiyey, Go'aami marka hore qiimaha madoorsoomaha saamigalka.

   b. $k = \frac{2}{2} = 1$, sidaas darteed, qiimayaasha maqni waa 3, 4, 5, 8 siday isugu xigaan.

   t. $k = \frac{36}{7.2} = 5$, dabadeed

   $k = \frac{17}{2} \Rightarrow 5 = \frac{17}{b} \Rightarrow b = 3.5$

   $k = \frac{t}{4.6}$ $\quad k = \frac{28}{j}$ $\quad k = \frac{x}{9}$

   $5 = \frac{t}{4.6}$ $\quad 5 = \frac{28}{j}$ $\quad 5 = \frac{x}{9}$

   t = 23 $\quad$ j = 5.6 $\quad$ x = 45

   Sidaas si la mid ah, waxaad u habayn kartaa kuwa hadhay.

j. $k = \frac{17}{3.4} = 5$ qimayaasha maqani waa 23, 5, 6, 7.2, 45 sida ay isuguxigaan

$\Rightarrow b = \frac{5}{4}$ $t = \frac{7}{4}$ j = 24 x = 32 kh = 12

x. $k = \frac{240}{18} = 5$

$\Rightarrow$ b = 25 t = 7 j = 55 x = 90

3. Maadaama x ~ y, waxan haysanaa in y = kx $\Rightarrow$ 12 = k.8 k = 1.5

Sidaas darteed, lammaaneyaasha layna siiyey, haddan ku lammaanayno 15 iyo 20 inama siinayso madoorsoomaha saamigalka ee k = 1.5.

4.

Bed (m^2)	22	13
Xaddiga bacrimiyaha (gm)	682	y

Maddaama oo xaddiga bacrimiye ee loo baahan yahay in lagu bacrimiyo qiyaas bed uu saanigal quman ku yahay xaddiga beerta badabeed

b. $\frac{682}{22} = \frac{y}{13} \Rightarrow y = 13 \times \frac{341}{11} = 403\,gm$ t. $8m^2$

5. b. $k = 1.5$

x	5	8	9	13
y	7.5	12	13.5	19.5

k = 3

x	5	8	9	13
y	15	24	27	45

t. k = 1.5

x	2	8	16	30
y	3	12	24	45

k = 3

x	1	4	8	15
y	3	12	24	45

6. b. $k = \frac{C}{L} = \frac{60}{3} = 20$

t. maadaama C ~ L, halka C = kL dabadeed, C = 20L

$C = 20 \times \frac{9}{2}$

C = 90 Birr

j. C = 20l

x.



5.3.2 Saamigal Rogaalka

Hadda ardaydu waxoogaa ilaa xad ayey ka yaqaanaan waxyaalo ku saabsan fikradaha saamiga iyo saamigalka quman, markaad ka doodaysaan qeybtan isticmaal hawlgal ay ka shaqeeyaan. Su'aalaha intooda badani waxaa loogu talo galay inay ardaydaada ka caawiyaan si ay u ursursadaan meelaha ugu muiimsan casharka.

Jawaabaha hawlgalka 5.6

1. b. x = 8 t. y = 2
2. b. hoos buu u dhacayaa

t. maya

j. haa, waxay noqoN 32 hawlgalkan marka laga tago, ku buuri ardayda inaad qoran tusaaleyasha ku qoran buugga ardayga.

Jawaabaha hawlgalka 5.7

b. haa, saamigalka rogaal

t.



Sawirka saamigalka rogaalka ahi ma'aha xariiq toosan, taas oo marta barta xudunta.

Qiimeyn

Si aad u caawiso ardaydaada xasuuso waxay ku soo barteen saamigal ka rogaalka adigoo samaynaya (dejinaya) su'aalo aasaasi ah. Bilow ahaan waxad isticmaali kartaa su'aalaha hoos lagugu siiyey.

1. Haddi xy = madoorsoome, dabadeed x iyo y waxaa la dhahaa waa ____ saamigal.
2. Coddee "tirada dadka iyo waqtiga ay ku dhammaynayaan shaqada" inay tahay saamigal quman iyo inay tahay saamigal rogaal ah?
3. Marka labada xaddi ee x iyo y ay yihiin saamigal rogaal ah, waxay u qoran yihiin _____.

Jawaabaha layliska 5.5

1. Maadaama y ku tahay saamigal rogaal ah x, waxaan haysanaa xy = k, dabadeed k = 5 × 40 = 200

   b. xy = k

   $$y = \frac{k}{x} = \frac{200}{x}$$

   t. $y = \frac{200}{x}$, dabadeed $100 = \frac{200}{x} \Rightarrow x = 2$

   j. $y = \frac{200}{x} \Rightarrow y = \frac{200}{20} \Rightarrow y = 10$

2. b. Saamigal rogaal ah t. saamigal rogaal ah j. Saamigal quman
3. x oo kaliya ayaa ah saamigal rogaal ah
4. maadaama x iyo y isla badalayaan si saamigal rogaal ah.

   b. waxaan haysanaa xy = b madoorsoome

   $\Rightarrow 36 \times 48 = 72 \times b = t \times 16 = j \times 12$

   b = 24, 5 = 108, j = 144

   t. Adigoo isticmaalya farsamo (hab) isku mid ah b = 3, t = 12, j = 9.5

Jawaabaha layliska nakhtiinka ah ee cuttubka 5aad

1. b. {–10} t. 29.2 j. ∅ x. ∅ kh. ma laha xalin d. {2}
2. b. $\left\{\frac{3}{2}\right\}$ t. {2, 1} j. {4,5} x. {2} kh. {22} d. {–2,0}
3. b. $x = y$ iyo $x + 6 = 13$ (Adigoo dhinac kasta ka goynayaa 6)
   t. $2 - x = 1$ iyo $x - 1 = 0$
   j. x – 8 = -2 waxay u dhigantaa x = 6 laakiin x – 8 = -2 uma dhiganto x + 9 = 3
4. maadaama x ~ y, waxay haysanaa $y = kx \Rightarrow 5 = 8k$

   $k = \frac{5}{8}$ (madoorsoomaha saamigalka)

   $\therefore\ y = \frac{5}{8}x \Rightarrow y = 12.5$
5. b. y ~ x, dabadeed y = kx

   $\Rightarrow 14 = k.10 \Rightarrow k = \frac{14}{10} \Rightarrow k = 1.4$

   ∴

x	10	25	35	15	45
y	14	35	49	21	63

   t. maadaama $y \sim \frac{1}{x}$, waxan haysanaa $xy = k \Rightarrow k = 16 \times 16 = 96$

   ∴

x	6	12	15	16	0.75
y	16	8	6.4	6	128

6.

Culeyska (kg)	2	5	t
Qiimaha (Birr)	12	b	36

Maadaama, culeyska muuska iyo qiimihiisu ay isu yihiin saamigal quman, sidaa darteed waxaa isticmaali karnaa xidhiidhka.

$$\frac{x_1}{y_1} = \frac{x_2}{y_2}$$

b. haddaba, $\frac{2}{12} = \frac{5}{b} \Rightarrow b = \frac{12 \times 5}{2} = 30\,\text{birr}$

t. iyo $\frac{2}{12} = \frac{t}{36} \Rightarrow t = \frac{2 \times 36}{12} = \frac{36 \times 2}{12} = 6 \Rightarrow t = 6$

j. Madoorsoomaha saamigalka, $k = \frac{y}{x} = 6$ ama $\left(k = \frac{x}{y} = \frac{1}{6} \right)$

7. b. Xariiqda l_1, ka qado baraha (1, 2), (2, 4) iyo (4, 8) tusaale ahaan, madoorsoomaha saamigalku waa 2.
   t. Xariiqda l_2, ka qaado baraha (1, 1), (2, 2) iyo (4, 4) tusaale ahaan, madoorsoomaha saamgalkuna waa 1.
8. Saamiigalada b, t iyo x waa saamigalo ragaal ah halka j iyo kh ay ka yihiin saamigal quman.

x	1	2	3	4	6	12
y	12	6		3	2	1

CUTTUB 6 JOOMETERIGA IYO CABBIRAADA

HORDHAC

Muhimada ugu weyn ee cuttubkani waa inla ballaadhiyo iyo la sii badiyo aqoonta iyo awooda ay ardaydu u leeyihiin fikradaha asaasiga ah ee joometeriga iyo cabbiraada cuttubku wuxuu u sii qeybsamaa Afar cuttubhoosaad. Cuttub-hoosaad kastaana waxuu u sii qeybsamaa, cinwaano-hoosaado. Cinwaanada lagaga hadli doono cuttubkani waa: xaglaha, dhismaha saddexagalada saddexagalada isu dhigma iyo cabbiraada.

Ujeedooyinka cuttubka:

Marka cuttubku dhammaado dabadeed ardaydu waxay awoodi doonaan inay:

- *caddeeyaan ama kala soocaan xag laha.*
- *caddeeyaan (sababeeyaan) seddexagalada isu-dhigma*
- *dhisaan seddexagalada*

Kaabayaasha loo doorbiday cuttubka 6aad

Buugga ardayga iyo tilmaame baraha, ma'aha ee waliba waxaa kale oo loo baahan yahay oo lagugula talinayaa in aad diyaariso waxaad fasalka u soo qaadataa alaabahan soo socda marka cinwaanka aad dhigayso looga baahado.

Qalabka

Lammaane kombasyo ah, mastarad, xagal-cabbire, qalabka labajibaaranaha, maqasyo iyo sabuurada wax lagu dhajiyo iyo xanjo.

Diyaari shax muujinaysa

- *lammaane xaglo ah oo daris ah*
- *lammaane xaglo daris ah oo ah lammaaneyaal is-dabayaal (xariiqah).*
- *Lammaane xaglo isbuuxsha (180°) iyo xaglo wadartoodu tahay 90°.*
- *Lammaane xaglo foodsaar ah*
- *Xaglaha ka samaysma marka gudbane jaro laba xariiqood*
- *Talaabooyinka la marayo marka la dhisayo seddexagalada ayadoo la isticmaalayo tijaabooyinka SAS, ASA iyo SSS.*
- *Tijaabada isku-dhiganka saddexagalada ayadoo la isticmaalayo SAS, SSS iyo ASA*
- *Isku-bedelka halbeegyada ayadoo mid loo badalayo ku kale.*
- *Wareegyada iyo badadka laydiyada, labajibbaaraneyaasha iyo seddexagalada.*
- *Muggaga shaxanada adkeyaasha.*

6.1 XAGLAHA

Waqtiga loo qoondeeyey: 8 xiisadood

Waxa ardayga laga rabo

Dhammaadka cuttub-hoosaadkan, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:

- *caddeeyaan xaglaha dariska ah iyo xaglaha food-saarka*
- *go'aamiyaan xaglaha wadartoodu tahay 90°*
- *go'aamiyaan xaglaha-isubuuxsha*

Ereyo cususb

Xagal, xaglo darisah, xaglo si toosan daris u ah, xaglo foodsaar ah, xaglo wadartoodu tahay 90° xaglo-isbuuxsha, xagal-buuxshe, gudbane, xariiqyo barbaro ah, xaglo-gudeed talantaali ah, xaglo dibadeed talantaali ah, xaglo-isku beegan, xaglo-gudeed iyo xaglo dibadeed.

Qalabka loo baahan yahay

Mastarad, xagal cabire, kombas, maqasyo, moodeel birisam iyo ku-dhululubo

Hordhac

Muhimada cuttub-hoosaadkani waa in ardayda la baro xaglaha in loo kala qeybiyo lammaaneyaal. Cuttub-hoosaadkani wuxuu ka soo farcamey doodeenii ee aan ku soo bilownay fasalka 5^{aad}. Cuttub-hoosaadkan wuxuu u sii qeybsamaa laba cinwaan. Cinwaanka koowaad wuxuu ka hadlaa xaglo lagu caddaynayo lammaaneyaal. Cuttub-hoosaadkan dhexdiisa ardaydu waxay ku baran doonaan xaglaha dariska ah iyo kuwa foodsaarkah, xaglaha dhamaystiran iyo kuwa isbuuxsha, xaglaha isku-lidka ah iyo astaamahooda ciwaanka labaad wuxuu ka hadli wax ku saabsan xaglaha lammaanaha ah.

Cuttub-hoosaadkan dhexdiisa, xaglaha lammaaneyaasha ahi waa kuwa ka samaysma marka gudbane uu jaro laba xariiqood oo barbaro ah. Ardaydu waxay daahfuri doonaan xidhiidhka ka dhexjira xaglaha lammaaneyaasha ah ee ka samaysma gudbanuhu marka uu ka gudbo laba xariiqood oo barbaro ah.

6.1.1 Xaglaha xidhiidhka leh

Gudbinta casharka

Casharka ku bilow adigoo weydiinaya ardayda qeexida xagal, dhinaca xagasha iyo geeska xagasha dabadeedna, ugu celceli sharaxa adigoo qaadanaya layliska nakhtiinka ee 6.1 adigoo ardayda ugu dhigaya hawlgal firfircooni galiya. Markay dhemmeeyaan layliska nakhtiinka ah u qeybi ardayda kooxo yar-yar hana ka doodaan hawlgalka 6.1 waxoogaa daqiiqado ah muddo yar ka dib, weydii inay soo jeediyaan jawaabahooda ay is dheheen waa sax. Adigoo ku salaynaya jawaabaha ardaydu doorteen, sii qeexida xaglaha dariska ah iyo xaglaha foodsaarka ah.

Weydii ardayda xidhiidhka ka dhexeeya xaglaha foodsaarka ah, haddii ay ku adkaato inay ku gabagabeeyaan in xaglaha foodsaarka ahi ay leeyihiin cabbiro isku mid ah, dabadeed tus ardayda sababta ay isugu mid noqdeen dabadeedna ku taageer qeexida xaglaha dariska ah iyo kuwa foodsaarka ah tusaaleyaal gacan ka qabad ah (muuqda).

Marka ardaydu ay kala saaraan xaglaha dariska ah iyo xaglaha foodsaarka ah, dabadeed qeex lammaaneyaasha xaglaha la yidhaa kuwa is-dhemaystira (90°) iyo kuwa isbuuxsha (180°).

Si aad u hubiso fahankooda sii ardayda waxoogaa laylis ah oo ku saabsan xaglaha isdhamaystira iyo kuwa isbuuxsha ugu dambayn waxaad isticmaali kartaa layliska 6.2 shaqo fasal ahaan iyo shaqo guri ahaan waxaad siin kartaa shago kooxeedka 6.1 inay guriga koox ahaan ugaga soo shaqeyaan haddii aad dhammayn kari weydo cuttub hoosaadka xiisad kaliya gudaheed, waxaad ka dhigan kartaa xiisad kale.

Jawaabaha layliska nakhtiinka ee 6.1

1. b. CA iyo CB waa dhinacyada ∠ACB t. C waa geeska ∠ACB
2. b. xagal toosan x. xagal fidsan (daacsan)
   t. xagal quman kh. xagal fiiqan j. xagal noqod
3. b. 140° t. 78° j. 240°
4. b. xagal dhacsan t. xagal fiiqan j. xagal daacsan (fidsan)
   x. xagal fidsan kh. xagal daacsan d. xagal quman
   r. xagal fiiqan
5. Xariiqo barbaro ahi waa xariiqo ku dul-dhaca isku sallax kuwaasoo aan isjarin marka la fidiyo. Xariiqaha marka la dheereeyo bar-iska gooya (wadaaga) waxaa la yidhaa xariiqo is jara.

Jawaabaha Hawlgalka 6.1

1. b. $\overline{BC}$ t. maya j. Haa, waxaa la yidhaa xaglo daris ah
   b. i) $\overrightarrow{AO}$ ii) 180°
   t. i) haa, $\overrightarrow{OB}$ waa dhinaca ay wadaagan ii) 180°
   j. haa x. xaglo foodsaar ah
   kh. haa, lammaanaha ∠AOB iyo ∠COD waxay leeyihiin cabbiro isku mid ah.

Jawaabaha hawlgalka 6.2

1. b. Wadarta xaglo kasta oo lammaane ahi waa 90°
   t. Wadarta xaglo kasta oo lammaane ahi waa 90°
   j. Ardaydu waxay kusiin karaan jawaabo kala duwan. Xaglaha suurto galka ah qaar ka mid ahi waa (2°, 88°), (55°, 37°), (45°, 45°) IWM
   x. haa, xaglo is dhamaystira (90°)
2. b. 30° + 150° = 180°
   1° + 179° = 180°
   60° + 120° = 180°
   90° + 90° = 180°
   t. lammaane kasta, wadarta xagluhu waa 180°
   j. ardayda waxay bixin karaan jawaabo kala duwan, jawaabahan soo socda ayaa suurto-gal ah inay ku siiyaan (44°, 136°), (2°, 178°), (63°, 117°), (110°, 70°)
   x. lammaane kasta oo xaglahan ah waxaa la yidhaa xaglaha isbuuxsha (buuxiye).

Jawaabaha layliska 6.2

1. ∠AOB iyo ∠BOC iyo ∠AOC iyo COD iyo ∠BOC iyo ∠COD
2. 43°
3. α = 90° - 32° = 58°
   β = 180° - 32° = 148°
4. m (∠LOM) = m (∠PON) = 46
   m (∠MON) = m (∠LOP) = 134°
5.

	α	β
b.	58°	32°
t.	69°	21°
j.	66°	24°
x.	47°	43°

6.

	δ	θ
b.	140°	40°
t.	12°	168°
j.	$24\frac{1}{2}^{o}$	$155\frac{1}{2}^{o}$
x.	25.5°	154.5°

7. i) x ii) kh iii) t iv) j v) b
8. ka soo qaad xagashu inay tahay x, dabadeed xagasha dhemmaystirtaa waa 90° - x.
   Haddaba, $x = 2(90° - x)$
   $x = 180° - 2x$
   $3x = 180° = 60°$
   Sidaas awgeed xagashu waa 60°.
9. Xagasha buuxisa xagal daacsani waa xagal fiiqan
10. 

∠BOJ iyo ∠TOJ waxay wadaagaan dhinaca $\overrightarrow{OJ}$ laakin ma'aha xaglo daris ah.
11. Maadaama θ iyo *r* ay labaduba ka dhigaan β, xagal buuxda, dabadeed θ + β = 180°, taasoo aan, helayno θ + β = *r* + β, haddaan dhinac kasta ka goyno β, waxaan heleynaa θ = δ.

Sidaas darteed, haddii ay laba xaglood u yihin xagal buuxshe, xagal isku mid ah dabadeed labada xaglood waa isku mid.

Jawaabaha shaqo kooxeedka 6.1

1. Ka soo qaad in xagashu tahay x°, dabadeed xagasha dhammaystirtaa waa 90° - x, xagasha buuxisaana waa 180° - x laakiin
   $180° - x = 3(90 - x) + 20$
   $180° - x = 270° - 3x + 20$
   $2x = 290° - 180°$
   $2x = 110 = 55°$
   Haddaba xagashu waa 55°.
   Hubi, in 55° uu yahay dhemaystiraha 35° iyo in xagasha buuxisa 125° ay tahay 55°
   $125° = 3(35°) + 20° = 105° + 20$
   $125° = 125°$

Qiimeyn

Ku bilow qiimeynta ardayda adigaoo ka weydiinaya afka qeexida tobxaha, xagal, geeska xagasha iyo dhinacyada xagasha si aad uga dhaadhiciso ardayda doodaada waxad isticmaali kartaa layliska nakhtiin ka ah ee 6.1 shaqo fasal ahaan maadaama oo su'aalaha intooda badani ay ka dhigan yihiin nakhtiin ahaan u isticmaal wqtiga ugu yar laylisyadan dabadeedna ardayda ka dhig kooxo ka koobu saddex-seeddex, kana dooda hawlgalka 6.1 shan daqiiqo, dabadeed ka jawaaba su'aahaha. Jawaabaha ay ku siiyaan wuxuu kaa caawin doonaa in aad qeexdo xaqlaha deriska ah iyo xaqlaha foodsarka ah dabadeed u gudub hawlqalka 6.2 isticmaal kooxihii aad samaysay hawlgalkii 6.1.

Weydii ardayda jawaabaha adigoo ku salaynaya jawaabahooda, waxaad qeexi kartaa xaglaha isdhamaystira iyo xaglaha isbuuxsha u sii layliska 6.2 shaqo guri ahaan waxaad ugu diri kartaa shaqo kooxeeda 6.1 inay koox ahaan uga soo shaqeyaan.

Waxaad u istixcmaali kartaa kooxihii aad samaysay hawlgalkii 6.1 iyo 6.2 shaqo kooxeedka 6.1 sidoo kale hawlgalkasta, layliskasta iyo shaqo kooxeed kasta hubi ardayda inay fahmeen.

6.1.2 Xaglaha iyo xariiqaha Barbarada ah

Gudbinta casharka

Ku bilow casharka adigoo weydiinaya ardayda su'aalahan soo socda

- *Labada barood ee P iyo Q, imisa xariiqood oo toosan ayaa laga samayn karaa oo mara.*
- *Haddii laba xariiqood oo kala duwan ℓ_1 iyo ℓ_2 ay isjaraan, imisa barood ayay iska jaraa?*
- *Hadii ℓ_1, ℓ_2 iyo ℓ_3 ay ku dul-dhecaan sallax isku midah ayna barbarona ahayn, taasoo ℓ_3 ay jarto ℓ_1, dabadeed ℓ_3 wey jartaa ℓ_2?*

U ogolow ardaydu inay su'aalahan ka doodaan waxoogaa miridho ah dabadeed waxoogaa mirido ah weydii jawaabaha ay u maleeyeen inay sax yihiin, kuna qor sabuurada.

Adigoo ku salaynayaa jawaabaha ardaydu doorbideen, sii jawaabahan soo socda su'aalaha.

- Waxaa jira hal xariiq kaliya oo marta labada barood ee P iyo Q.
- Haddii laba xariiq oo toosani isjaraan, dabadeed waxay iska jaraan hal bar ah.
- Haddi ℓ_1, ℓ_2 iyo ℓ_3 ay ku dul-dhacaan sallax isku mid ah, ayna barbarona ahayn, taasoo ℓ_3 ay jarto ℓ_1, dabadeed l_3 sidoo kale waxay jartaa ℓ_2.

Jawaabta aad siisay su'aasha 3^{aad} waxay

Kaa caawin doontaa inaad siiso qeexida gudbane iyo lammaaneyaasha xaglaha ah ee kala duwan ee ka sameysma gudbanaha marka uu ka gudbo labada xariiqood. Sidaa darteed sii qeexida gudbane iyo lammaaneyasha xaglaha ah ee ka samaysma. Hubi in arday kastaa si cad u fahamay qeexida aad sheegtay (siisay). Xasuusi sidoo kale qeexida xariiqaha barbarada ah dabadeed ardaydu ha ka doodaan hawlgalka 6.3 si ay su'aalaha uga shaqeeyaan ardaydu waa inay fasalka u soo qaataan qalabka labajibbaaranaha, mastarad, iyo xagal cabire su'aalahan waxay ardayda awoodsiin doonaan inay gabagabo muhiim ah ku gabagbeeyaan sidoo kale daba soco caawina si ay u keenaan gabagabada hawlgalka laga filayo miridho ka dib, weydii koox kastaa inay sheegaan jawaabta ay doorbideen inay sax tahay. Adigoo ku salaynaya jawaabaha ardayda, u soo koob ardayda, sheegna gabagabada hawlgalka. Gabagabada aad samaysaa waa gabagabo muhiim ah sidoo kale hubi fahanka ardayda adigoo weydiinaya su'aalo afka ah/oo ku saabsan xaglaha ka samaysma gudbnahu, marka u ka gudbayo xariiqyada barbarada ah haddii aad hubtid in ardaydu u fahmeen qeexida si cad, dabadeed u dir layliska 6.3 shaqo fasal ahaan iyo shaqo guri ahaan ha iloobin in aad shaqada ardayda u hubisid si joogto ah.

Jawaabaha hawlgalka 6.3

1. x. waa isle'eg yihiin
   kh. lammaane xaglo-gudeed talantaali ahi waa isku mid
   d. haa
   r. 180°

2. Markaan eegno x, kh, d iyo r waxaa lagu gabagabayn karaa sidan soo socota. Marka laba xariiqood oo barbaro ah uu ka gudbo gudbane.
   b. xaglo dibadeedka talantaaliga ahi waa isku mid
   t. xaglo dibadeedka talantaaliga ahi waa isku mid
   j. xaglaha isku-beegani waa isku mid
   x. xaglo gudeedka ka samaysma dhinac isku midka ah eee gudbannhu waa xaglo isbuuxsha.

Jawaabaha layliska 6.3

1. b. ∠NMQ iyo ∠TPQ waa xaglo gudboon
   t. Marka $\overleftrightarrow{MN}$ uu barbaro la yahay $\overleftrightarrow{PT}$
2. i) m (∠BEF) = 72° iv) m (∠DGH) = 108°
   ii) m (∠FGD) = 72° v) m (∠CGH) = 72°
   iii) m (AFG) = 72° vi) m (∠FGC) = 108°
3. m (∠ACM) = 45°
4. m (∠D) = 180° - 73° = 107° = m (∠F)
   m (∠G) = 73
5. b. m (∠2) = 50°
   m (∠3) = 130°
   m (∠1) = 130°
   t. m (∠1) = 100°
   m (∠2) = 100°
   m (∠3) = 80°
6. b. Maadaama $\overleftrightarrow{BX} \parallel \overleftrightarrow{TJ}$, dabadeed
   m (∠B) + m (∠T) = 180°
   $\Rightarrow 6x + 3x = 180° \Rightarrow 9x = 180° \Rightarrow x = 20°$
   t. Maadaama $\overleftrightarrow{MN} \parallel \overleftrightarrow{OQ}$, dabadeed
   m (∠MNO) = m (∠QON)
   Hadaba,
   $$150° = 2x$$
   $$\frac{150^o}{2} = x$$
   $$x = 75°$$
7. m (∠2) = 70°

Qiimeyn

Waxaad isticmaali kartaa su'aalaha aan xagga sare ku soo jeedinay inaad afka ka waydiiso. Su'aalahani waxay kaa caawin doonaan inaad qeexdid gudbane iyo inaad ka doodaan astaamaha xaglaha ka samaysma marka gudbanuuhu uu ka gudbo

xariiqyo barbaro ah. Dabadeed ardaydu ha ka doodaan hawlgalka 6.3 kooxo saddex sedex ka kooban hawlgalkani wuxuu ku lug-leeyahay ama uu ka hadlaa cabbiraada xaglaha. Sidaa darteed hubi in ardaydu garteen sida loo cabbiro xaglaha ayagoo isticmaalya xagal cabbire (protractor) hubi sidoo kale in ardaykastaa haysta xagal cabbire dabadeedna sii layliska 6.3 shaqo guri ahaan, hubi in ardaydu laqliska si sax ah ugu shaqeeyeen intaanad u gudbin cuttub-hoosaadka ku xiga.

6.2 DHISMAHA SADDEXAGALADA

Waqtiga loo qoondeeyey: 10 xiisadood

Waxa ugu yaree ardayda laga rabo inay gartaan:

Dhammaadka cuttub-hoosaadkan ardaydu waxay awoodi doonaan inay:

- *dhisaan seddexagal seddexdiisa dhinac lagu siiyey.*
- *dhisaan seddexagal laba-dhinac iyo xagasha u dhaxaysa lagu siiyey.*
- *dhisaan seddexagal laba-xaglood iyo dhinaca u dhexeeya lagu siiyey.*
- *sharaxaan xidhidhka ka dhexeeya dhinacyada iyo xaglaha sadeexagalka.*
- *shararxaan xidhiidhka ka dhexeeya dhinacyada seddexagalka.*

Ereyo cusub

Seddexagal, xariijin, xagal, gacanka goobo gobolka, goobo gobal, xagal u dhexaysa laba dhinac iyo dhinac u dhexeeya laba xaglood.

Hordhac

Cuttub-hoosaadkani wuxuu ka hadlaa dhismaha saddexaglada marka xubnihiisa qaar ka mid ah lagu siiyo wuxuu leeyahay hal cinwaan oo ka hadlaya dhismaha saddexagalada iyo xidhidhka ka dhexeeya dhinaacyada iyo xaglaha seddexagalada. Fasalkii 5^{aad} waxay ku soo qaateen waxoogaa aqoon ah oo ku saabsan waxayaalaha aasaasiga u ah dhismaha. Cuttub-hoosaadkani waa casharadii hore aan u soo aragnay oo la ballaadhiyey.

6.2.1 Dhismaha seddexagalada

B) Dhismaha seddexagalada marka dhererka seddexdiisa dhinac lagu siiyo

Gudbinta casharka

Waxad casharka ku bilaabi kartaa marka ugu horeysa adigoo ardayda xasuusinaya isticmaalka lammaane kombasyo ah iyo mastarad iyo waliba adigoo xasuusinaya waxa uu yahay seddexagal iyo sida loogu bixiyo magac. Intaanad bilaabin dhismaha ka hor, hubi in arday kastaa haysto kombasyo iyo mastarad. Sii muddo ay kaga shaqeeyaan shago kooxeeda 6.1 hana uga shaqeeyaan shaqo kooxeedkan lammaane-lammaane shaqo kooxeedka ka dib, waxaad u sharixi kartaa dhismaha,

hubi in ardaydu si fiican u fahmeen talaabooyinka la marayo marka dhismaha. Markaad dhamayso dhismaha ka dib. Ardaydu ha ka shaqeeyaan layliska 6.4.

Waxaa laga yaabaa in ardayda qaarkood dhibaata kala kulmaan dhismaha, siddas darteed ku wareeg fasalka caawina kuwa u baahan caawimadaada haddii aad hubtid in ardaydu si cad u fahmeen talabooyin la raacayo marka wax la dhisayo, dabadeed waxaad u gubdi kartaa hawlgalka 6.4 hawlgalkani wuxuu kaa caawin doonaa inaad sheegtid kala duwanaanta seddexagalka dabadeedna u sii layliska 6.5 shaqo guri ahaan.

Jawaabaha shaqo kooxeedka 6.1

Shaqo kooxeedkani wuxuu ku jihaysan yahay in ardayda uu ka caawiyo siday u guurin lahaayeen xariijin iyo xagal. Sidoo kale waa inay raacaan talaabooyinka ku qoran dhismaha (1) iyo (2) ee buugga ardayya ayna dhisaan xariijin iyo xagal cabirkeeda lagu siiyey.

Ardayda ka shaqeynaysa shaqo kooxeedka waa inaad u kuur gashaa ku boorisaana (Taageertaa). Ardayda qaarka mid ahi waxay u baahan yihiin taageeradaada.

Jawaabaha hawlgalka 6.4

Seddexlaabiyadu ma raaligalinayaan xaalada dheeliga seddexagalka:

1. j, x, kh, d, r $\Rightarrow$ waa suurtogal in laga samayn karo saddexagalo laakiin b iyo t suurtogal ma'aha waayo waxaa daliil u ah xeerka dheeliga saddexagalada.
2. Wadart labo kamid ah tirooyinka saddex – layda horsan ee b iyo t kama wayno tirade saddexaad, laakiin in takale weey waafaqsanyihiin.
3. b. $b + t > j$
   t. $t + j > t$
   j. $t + j > b$
4. Wadarta dhererka laba dhinac oo kasta waa in uu ka weynaado dhererka dhinaca seddexaad.

Jawaabaha layliska 6.4

1. Layliska 6.4 waxaa loogu talo-galay in uu ardayda ka caawiyo inay si qacan ka qabasho ah u sameeyaan dhismaha 3^{aad} ayagoo isticmaalaya cabbiro qaar ah. Sidoo kale ardaydu ha raacaan talaabooyinka ku qoran dhismaha 3^{aad} hana dhisaan seddexagalada laylisku baahan yahay ayagoo isticmaalaya lammaane kombasyo ah iyo mastarad, wayfiican tahay haddii ardaydu ay ku dul-sawiran warqad cad oo nadiif ah eyna keenaan fasalka waxay sawireen hubi shaqada ardayda, kana dooro ta ugu fiican kuna dheji sabuurada ogeysiis ka lagu dhegiyo ama fasalka dhexdiiisa si ay u dhiiri geliso ardayda.

2. Ayadoo la isticmalayo seddex-seddexda tiro ee lagugu siiyey (b) (j) iyo (kh) waxaad heli kartaa seddexagal, haddaad isticmaasho seddex sedexda tiro ee lagugu siiyey (t) iyo (x) na heli maysid seddexagal, haddaad isticmaasho seddex-seddexda tiro ee lagugu siiyey (t) iyo (x) na hali maysid seddexagal.
3. b. 7 sm
   t. 2 sm
   j. 4,5 sm

Qiimeyn

Waxaad ku fahmi kartaa ardayda inay fahmeen cinwaan hoosaadkan adigoo isticmaala shago kooxeedka 6.2, layliska 6.4, hawlgalka 6.4 iyo layliska 6.4, layliska 6.5 waxaad u siin kartaa shaqo guri ahaan.

T) Dhismaha 4^{aad}

Gudbinta casharka

Casharka waxaad ku bilaabi kartaa adigoo ugu calinaya (Nakhtiin) talaabooyinka loo baahan yahay si loo sameeyo (dhiso) seddexagal marka lagu siiyo dhererka seddexdiisa dhinac dabadeed u soo koob talaabooyinka loo baahan yahay si loo sameeyo (sawiro) seddexagal marka laba dhinac iyo xagasha u dhaxaysa la haysto ama lagu siiyo.

Ayagoo raacaya talaabooyinkan ardaydu ha sawiraan (sameeyaan) iyaga laftoodu. Ardayda qaarkood waxaa laga yaabaa inay ku adkaat dhismaha seddexagalku sidaa darteed ku wareeg ardayda, caawina hubi ardayda shaqadooda, dhiiri galina ardayda sawirka saxda ah sameeyay. Dhimaha ka dib ardaydu gacantooda ha ka qabtaan dhismaha 4, aad adigoo uga gudbaya layliska 6.6 shaqo fasal ahaan iyo shaqo guri ahaanba. Ardaydu waxay uga shaqeyn karaan layliska 6.6 koox-koox ahaan ama mid-midba.

Jawaabaha layliska 6.5

Ujeedada layliskani waa in uu ardayda ka caawiyo sidii ay si gacan ka qabasho ah u mari lahaayeen talaabooyinka la raacayo marka la sameynayo seddexagal lagu siiyey labadiisa dhinac iyo xagasha u dhaxaysa. Sidoo kale ardaydu ha raacaan talaabooyinka dhismaha 4^{aad}, hana sawiraan seddexagalada hubi in arday kastaa si sax ah u sawiri (sameyu) karo seddexagalada asagoo isticmaalaya lammaane kombasyo ah iyo mastarad u sax shaqadooda, doorona midka ugu shaqo fican, kuna dheji sabuurada Agteeda.

Qiimeyn

U sii layliska 6.6 shago fasal ahaan iyo shago guri ahaan, hubina shaqadooda.

J) Dhismaha 5aad

Gudbinta cahsarka

Dhismahan ardaydu waxay ku baran doonaan sida loo dhiso seddexagal marka la haysto laba xaglood iyo dhinaca u dhexeeya. Siddo kale marka u horeysa u soo koob talaabooyinkii la qaaday dhismaha 1aad mid-mid dabadeed ardaydu ha dhisaan (sameeyaan) seddexagalka. Ayagoo raacaya talaabooyinka ugu qoran iskood. Markay ardaydu sameynayaan dhismaha ku wareeg fasalka, hubina shaqada ardayda adigoo ka caawinaya waxay u baahan yihiin, dhiirigali ardayda dhismaha u samaysay si sax ah. Haddii aad hubtid in ardaydu ay si sax ah u sameeyeen dhismaha, dabadeed sii qaar ka mid ah su'aalaha layliska 6.7 shaqo fasal ahaan inta hadhayna u sii shaqo guri ahaan u sheeg ardayda inay shaqada u qabtaa si nadiif ah.

Jawaabaja layliska 6.8

Layliska 6.7 waxaa loogu talo galay in uu ardayda ka caawiyo inay si gacan ka qabasho ah u sameeyaan, dhismaha 5aad, ardayda u sheeg inay raacaan talaabooyinka dhismayaasha ayna ka shaqeeyaan laylisyada.

Qiimeyn

U isticmaal laylisak a 6.7 shaqo fasal iyo shaqo guri.

X) Xidhiidhka ka dhaxeeya dhinacyada iyo xaglaha seddexagalka

Gudbinta casharka

Waxaad ku bilaabi kartaa casharka adigoo u nakhtiimaya kala soocida seddexagalada ayadaoo lagu salaynaayo dhererka dhinacyadooda iyo cabbirka xaglahooda, kaasoo ay ku soo barteen fasalkii 5aad dabadeedna u isticmaal hawlgalka 6.5 si uu u noqdo hawlgal dardar galiya ardayda ha u qabtaan koox-koox hawlgalka ujeedada hawlgalkani waa in ardayda laqu hogaamiyo sidii ay iskood ugu gabagabyn lahaayeen xidhiidhka ka dhex jira dhinacyada seddexagalada iyo xaglaha haddii aad hubto in ay ardaydu si fiican uga shaqeeyeen hawlgalka dabadeed sheeg gabagabada hawlgalka, taasoo uu sheegayo buugga ardaygu, ku taageer gabagabadan adigoo isticmaalaya tusaaleyaal gaar ah dabadeed u sii layliska 6.8 shaqo guri ahaan.

Jawaabaha hawlgalaka 6.5

2. Seddexagal, ka labaalaha ah xaglaha ka soo horjeeda dhinacyada isle'egi wey isle'eg yihiin. Seddexagalka simana seddexdiisa xaglood dhammaan cabbirkoodu waa isku mid taas oo xagal kasta oo seddexaglka siman xaglihiisa ka mid ah cabbirkeedu waa 60°,
4. b. haa t. haa j. haa x. haa
5. seddexda xaglood ee seddexagalka siman cabbirkoodu waa isku mid. Taas oo cabbirka xagal kasta oo seddexagalka siman cabbirkeedu yahay 60°.
6. Maya

Jawaabaha layliska 6.8

1. $\overline{BJ}$
2. Maya, waayo tirooyinku ma-raali galinayaan xaalada dheeliga seddexagalka.
3. Haa, m (∠R) = 180° - (30° + 30°) = 120°

Qiimeyn

Waxaad ku qiimeyn kartaa ardayda in aad u dirto hawlgalka 6.5 iyo layliska 6.8 shaqo fasal ahaan iyo shaqo guri ahaanba. Waxaa kale oo aad isticmaali kartaa tusaaleyaasha ku yaala buugga ardayga adigoo afka ka weydiinaya.

6.3 SADDEXAGALO ISU-SARGO'AN

Waqtiga looqoondeeyey: 12 xiisadood

Waxa ardaydo laga rabo

Dhammaadka cuttub-hoosaadkan ardaydu waxay awoodi doonaan inay:

- *Sharaxaan fikradaha isu-sargo'naanta seddexagalada*
- *Hubiyaan isu-sargo'naanta seddexagalo lagu siiyey adigoo isticmaalaya baadhitaan sawirid, goynaya iyo adigoo is-dulsaaraya.*
- *Caddeeyaan isku-sargo'naanta laba seddexagal oo lagu siiyey adigoo isticmaalaya dhardhaarada isku-sargo'naanta (tests) SAS, SSS iyo ASA.*

Ereyo cusub

Isu-sargo'an, Dhinacyada isu-beegan, Xaglaha isu-beegan, Seddexagalo isu-sargo'an

Dhardhaarada SSS ee isu-sargo'naanta,

Dhardhaarka SAS ee isu-sargo'naauta,

Dhardhaarka AAS ee isu-sargo'naanta.

Hordhac

Muhimada ugu weyn ee cuttub-hoosaadkani waa in ardayda la baro isku-sargo'naanta seddexagalada iyo dhardhaarada isku-sargo'naanta cuttub-hoosaadkani wuxuu u sii qeybasamaa laba cinwaan-hoosaad. Cinwaan-hoosaadka koowaad ardaydu waxay ku baran doonaan qeexida dhabta ah ee isku-sargo'naanta cinwaan-hoosaadka labaad waxaa lala qabaadsiin doonaa dhodhaarada isu-sargo'naanta. Waxay ku baran doonaan seddex dhardhaar oo muhiim ah oo isku-sargo'naanta ah.

Waxaana la kala dhahaa: Dhardhaarka SSS,dhardhaarka SAS iyo Dhardhaarka AAS.

6.3.1 Isku-sargo'naanta seddexaglada

Gudbinta casharka

Nidaamka iyo calaamadaha isku-sargo'naanta waa midka mid ah waxayaalaha ugu muhiimsan barashada joometeriga. Sidaa darteed waa, inaad siisaa waqti aad kaga dhaadhiciso, kuna barto ardayda fikradaha cuusub waa inaad isticmaasho hababa kala duwan si ay ardaydu si dhibyar fahmaan (ururSadaan) fikradahan. Waxaa kale oo aad isticmaali kortaa sawiro kala duwan oo aad ka samaysay warqado aad goysay si uu kaaga caawiyo casharka waxad ku bilaabi kartaa hawlgalka 6.6 si aad ardaydu u firfircooni galiso.

Ujeedada hawlgalkani waa sidii ardayda looga caawin lahaa inay fahmaan in laba sawir oo joometeri ay isku-sargo'naan doonaan haddii labada sawir ee joomatari ay leeyihiin qaab iyo xajmi isku mid ah.

Hawlgalka ka dib waxaad siin kartaa qeexida loogu talogalay ee isku-sargo'naan ee ku qoran buugga ardayga hubi in ardaydu fahmeen qeexida, ku taageer qeexida adigoo siinaya tusaaleyaal ku filan. Isla-markaana bar ardayda summadaha loo isticmaalo isku-sargo'naanta seddexagalada dabadeed ha ka shaqeeyaan shaqo kooxeedka 6.3 kooxo-seddex-seddex ah hana tijaabiyaan isu-sargo'naanta seddexagalada ayagoo isticmaalaya warqad ay qooyaan.

Jawaabaha hawlgalak 6.6

Ogow in su'aalaha lagugu siiyey hawlgalka 6.6 intooda badani ay yihiin tijaabo. Sidaa dardeed ardaydaada ku dhiirigali inay isku-tijaabiyaan hawlgalka.

1. b. maadaama oo aanay labada sawir lahayn qaab isku mid ah, dabadeed ma'aha isku qaab.
   t. maya
2. b. haa
   t. maya, waayo waxay leeyiliin dhinacyo kala duwan.
   j. maya, waayo waxay leeyihiin dherer iyo ballac kala duwan.

3. b. maya t. maya
4. b. haa t. maya
5. b. haa t. haa
   j. haa, marka xaglaha ku calaamadsan xarfuhu ay isku mid yihiin.

Jawaabaha shaqo kooxeedka 6.3

1. Inta jeer ee seddexagal la dhisaa waxa laga yaabaa in ay isku-sargo'an tahay isaga laftiisu ayadoo ku xidhan nooca seddexagalka, haddii uu yahay seddexagal aan isle'ekayn oo seddexdiisa dhinac kala duwan yihiin, waxaa jira uun hal jid oo kaliya, hadduu yahay labaale waxaa jira laba jid, haddii uu yahay mid seddexdiisa dhinac isle'eg yihiin waxaa jira lix jid.
2. Waxaa jira lix jid oo kale duwan.

Qiimeyn

Ardayda waxaad ku qiimeyn kartaa adigoo weydiiya su'aalo afka ah ayna ka shaqeeyaan masalooyinka lagugu siiyey tusaale ahaan buugga ardayga shaqo fasal ahaan waxa kale oo aad u habayn su'aalo aad adigu samayso inay guriga kaga soo shaqeeyaan.

3-da dhardaar ee isu-sargo'naanta seddexagalada

Waxaad ku bilaabi kartaa cinwaan hoosaadkan adigoo xasuusinaya ardayda qeexida isu-sargo'naanta seddexaglada iyo summadaha loo isticmaalo sargo'nida. Dabadeed bar seddexda dhardhaar ee loo isticmaalo si loo caddeeyo sargo'naanta seddexagalada.

B. Dhardhaarka Dhinac-xagal-dhinac (SAS)

Qaybtan waxaad ku bilaabi kartaa adigoo qaadanaya hawlgalka 6.7 waxaa la rajeynayaa in ardaydu ay aakhirka Imaan doonaan maxsuulka dhadhaarkan ayagoo samaynaya tijaabo. Sidaas awgeed ka dhig ardayda koox-koox, seddex-seddex ah, hana ka doodaan su'aalaha lagugu siiyey hawlgalka. Ardaydu waxay u baahan yihiin inay haystaan qalabka xisaabta ardaydu ha soo jeediyaan jawaabaha ay doorbideen inay sax yihiin adigoo ku salaynaya jawaabaha ardaydu bixiyeen. Sheeg dhardhaarka isu-sargo'naanto seddexagalada ee SAS. Hubi in ardaydu si cad u fahmeen dhardhaarkan ku taageer dhardhaarkan SAS tusaaleyaal ku filan dabadeedna isticmaal layliska 6.9 shaqo fasal ahaan iyo shaqo guri ahaanba.

Jawaabaha hawlgalka 6.6

1. d. BJ = DKH = 5 sm r. haa s. haa
2. haa, haa

Jawaabaha layliska 6.6

1. b. $\angle B \equiv DKH = 5$ sm r. $\overline{RS} \equiv \overline{NQ}$ s. $\angle Q \equiv \angle X$

2. 1. $\overline{BJ} \equiv \overline{TJ}$ waa lagu siiyey
   2. $\angle BJX \equiv \angle TJX$ siin
   3. $\overline{JX} \equiv \overline{JX}$ dhinaca ay wadaagaan labada seddexagal
   4. Sidaas darteed, $\Delta BJX \equiv \Delta TJX$ marka loo eego dhardhaarka SAS iyo talaabooyinka 1, Q iyo 3.

3. Seddexagalada, ΔAEB iyo ΔDEC

   Siin, $\overline{AE} \equiv \overline{DE}$ iyo $\overline{BE} \equiv \overline{CE}$

   si loo caddeeyo: in $\Delta AEB \equiv \Delta DEC$

   Falanqeyn

   1. $\overline{AE} \equiv \overline{DE}$ siin
   2. $\angle AEB \equiv \angle DEC$ xaglo foodsaar ah
   3. $\overline{BE} \equiv \overline{CE}$ siin
   4. $\Delta AEB \equiv \Delta DEC$ talaabooyinka 1, 2, 3 iyo dhardhaarka SAS.

4. Seddexagalada: ΔBTX iyo ΔJTX

   Siin: $\overline{BT} \equiv \overline{JX}$ iyo $\angle BTX \equiv \angle JTX$

   Si loo caddeeyo: in $\Delta BTX \equiv \Delta JTX$

   Falanqeyn (Dood):

   1. $\overline{BT} \equiv \overline{JT}$ siin
   2. $\angle BTX \equiv \angle JTX$ siin
   3. $\overline{TX}$ waa dhinac ay wadaagaan
   4. Sidaas darteed, $\Delta BTX \equiv \Delta JTX$ talaabooyinka 1, 2, 3 iyo dhardhaarka SAS.

5. Seddexagalada: ΔABE iyo ΔCFD

   Siin: 1. $\overline{AB} \equiv \overline{CD}$
   2. $\overline{BE} \equiv \overline{DF}$
   3. $\angle ABE \equiv \angle CDF$

   Si loo caddeeyo: in $\Delta AEB \equiv \Delta CFD$

   Faallo:

   1. $\overline{AB} \equiv \overline{CD}$ siin
   2. $\angle ABE \equiv \angle CDF$ siin
   3. $\overline{BE} \equiv \overline{DF}$ siin
   4. Sidaas darteed, $\Delta ABE \equiv \Delta CDE$ talaabooyinka 1, 2, 3 iyo dhardhaarka SAS.
   5. Hadaba, $\angle AEB \equiv \angle CED$

6. $\angle ABC \equiv \angle DEF$
7. $\overline{PR} \equiv \overline{US}$

T) Dhardhaarka dhinac dhinac-dhinac ee isu-sarqo'naanta seddexagalada

Gudbinta casharaka

Ku bilow cinwaan-hoosaadka, adigoo ugu celinaya dhardhaarka SAS ee sargo'naanta seddexagalada dabadeed weydii ardayda su'aalahan soo socda "miyey jiraan dhardhaaro kale oo aan ahayn SAS, oo loo isticmaalo in lagu caddeeyo isu-sargo'naanta seddexagalada"? u agolow ardayda inay ka fikiraan inuu jiro dhardhaar kale.

Habee jawaabaha ardayda, kuna hogaami ardayda shaqo kooxeedka 6.4 ha kaga shaqeeyaan shaqo kooxeedka kooxo seddex seddex ah, hana helaan jawaabaha. Adigoo ku salaynaya jawaabahooda. Ardayda sheeg dhardhaarka SSS ee isu-sargo'naanta saddexaqalada ku kab (caawi) dhardhaarkan tusaalayaal dabadeed, u sii layliska 6.10 shaqo fasal ahaan iyo shaqo guri ahaanba.

Jawaabaha shaqo kooxeedka 6.4

Ujeedada shaqo kooxeedkani waa in ardayda lagu dhiirigaliyo inay dhardhaarkan SSS ku soo gabagabeeyaan tijaabin cinwaan-hoosaadki 6.2 waxay ku soo barteen sida loo dhiso seddexagalada marka la haysto seddexda dhinac ayadoo la isticmaalayo lammane kombasyo ah iyo mastarad. Ayadoo tan loo eegayo, wey ka jawaabi karaan su'aalaha ayadoo lagu salaynayo dhismaha ay dhiseen.

3. Haa
4. Haa, $\Delta ABC \equiv \Delta DEF$: maadaa $\overline{AB} \equiv \overline{DE}, \overline{BC} \equiv \overline{EF}, \overline{CA} \equiv \overline{FD}, \angle A \equiv \angle D, \angle E$ iyo $\angle C \equiv \angle F$

Jawaabaha layliska 6.7

1. Seddexagalada ABC iyo ACD
2. $\overline{AB} \equiv \overline{AC}$ iyo $\overline{DB} \equiv \overline{DC}$

   ii) m ($\angle BDA$) = 30°
   si loo helo m ($\angle BEC$)

Falanqeyn

1. $\overline{AB} \equiv \overline{AC}$ siin
2. $\overline{BD} \equiv \overline{CD}$ siin
3. $\overline{AD}$ waa dhinaca ay wadaagaan

4. $\Delta ABD \equiv \Delta ACD$ talaabooyinka 1, 2, 3 iyo SSS
5. Hadaba, $\angle BDA \equiv \angle CDA$ talaabada 4^{aad} iyo qeexida isku-sargo'naanta.
6. Laakiin m ($\angle BDA$) = 30° siin
7. Hadaba m ($\angle CDA$) = 30°

2) Saddexagalada ΔBDE iyo ΔCEB

i) $\overline{BD} \equiv \overline{CE}$

ii) $\overline{DC} \equiv \overline{EB}$

iii) m ($\angle BDE$) = 50°

si loo raadiyo m ($\angle BEC$)

Falanqeyn

1. $\overline{BD} \equiv \overline{CE}$ siin
2. $\overline{DC} \equiv EB$ siin
3. $\overline{BC} \equiv CB$ dhinac ay wadaagaan
4. Hadaba, $\Delta BDC \equiv \Delta CEB$ talaabooyinka 1, 2, 3 iyo SSS
5. $\angle BDC \equiv \angle CEB$ talaabada 4 iyo qexida isu-sargo'naanta seddexagalada.
6. Laakiin m ($\angle BDC$) = 50°
7. Dabadeed m ($\angle CEB$) = 50° qeexida isu-sargo'naanta xaglaha iyo talaabada (5).
8. Sidaas darteed, m ($\angle BEC$) = 50°

3) Seddexagalada ΔABD iyo ΔACD

1. $\overline{AB} \equiv \overline{AC}$
2. $\overline{BD} \equiv \overline{CD}$

Si loo caddeeyo: $\angle ADB \equiv \angle ADC$

Falangeyn:

1. $\overline{AB} \equiv \overline{AC}$ siin
2. $\overline{BD} \equiv \overline{CD}$ siin
3. $\overline{AD}$ waa dhinaca ay wadaagaan
4. Hadaba, $\Delta ABD \equiv \Delta ACD$ talaabooyinka 1, 2, 3 iyo SSS
5. Sidaas awgeed $\angle ADB \equiv \angle ADB$ talaabada 4^{aad} iyo qeexida isu-sargo'naanta seddexagalada.

4) Seddexagalada, ΔABC iyo ΔDCE

1. $\overline{AB} \equiv \overline{CD}$
2. $\overline{AC} \equiv \overline{ED}$
3. $\overline{BC} \equiv \overline{CE}$
4. m ($\angle CBA$) = 70°

Si loo raadiyo m ($\angle D$)



Fallanqeyn

1. $\overline{AB} \equiv \overline{DC}$ siin
2. $\overline{AC} \equiv \overline{DE}$ siin
3. $\overline{BC} \equiv \overline{CE}$ siin
4. Sidaa awgeed $\Delta ABC \equiv \Delta DCE$ talaabooyinka 1, 2, 3 iyo SSS
5. Sidaa awgeed, $\angle BAC \equiv \angle CDE$
6. Laakiin m ($\angle BAC$) = 70° siin
7. Sidaa awgeed m ($\angle CDE$) = 70° talaabooyinka 5, 6 iyo qeexida isu-sargo'naanta seddexagalada.
8. Sidaas darteed, m ($\angle D$) = 70°

5) Seddexagalaada, ΔABD iyo ΔDCA

1. $\overline{AB} \equiv \overline{DE}$
2. $\overline{BC} \equiv \overline{EF}$

Si loo caddeeyo
$\Delta ABD \equiv \Delta DCA$

Fallanqeyn (faalo)

1. $\overline{AB} \equiv \overline{DE}$ siin
2. $\overline{BC} \equiv \overline{CA}$ siin
3. $\overline{AD} \equiv \overline{DA}$ xariiqa laftiisa ayaa isu-sargo'an
4. $\Delta ABD \equiv \Delta DCA$ talaabooyinka 1, 2, 3 iyo SSS.

6) ΔABC ≡ ΔDEF . . . SSS

Laakiin ΔABC waa seddexagal xagal fiiqan leh sidoo kale ΔDEF waa seddexagal xagal fiiqan leh.

7. $\overline{BC} \equiv \overline{AD}$

J) Dhardhaarka xagal-dhinac-xagal ee isu-sargo'naanta seddexagalada (ASA)

Gudbinta Casharka

Waxaad ku bilowdaa casharka adigoo u nakhtiimaya dhardhaarada SAS iyo SSS ee isu-sargo'naanta seddexagalada, weydiina ardayda su'aasha "miyey jirtaa Dhardhaar kale oo ka duwan SAS iyo SSS taas loo isticmaalo isu-sargo'naanta seddexagalada" u tilmaan hadday jirto tu kale, habee jawaabahooda, sheeg qeexida 6.9, kuna taageer qeexida tusaalaha 7^{aad}.

Markaad sheegtid qeexida 6.9 dabadeed isticmaal hawlgalka 6.8 si aad ugu dardargaliso ardayda in aad u hogaamiso Dhardhaarka seddexaad ee sargo'naanta ka samee ardayda kooxo ka kooban sedex seddex, hana ka doodaan hawlgalka 6.8 adigoo ku salaynaya jawaabaha ardayda sheeg dhardhaarka xagal-dhinac-xagal ee sargo'naanta seddexagalada ku taageer Dhardhaarka xagal dhinac xagal tusaaleyal gaar ah ugu dambaynta isticmaal Layliska 6.11 shaqo fasal ahaan iyo shaqo guri ahaan.

Qiimeyn

Waxaad qiimeyn kartaa ardayda adigoo weydiinaya su'aalo afka ah ku soo jiido in ay ka shaqeyaan hawlgalka 6.8 iyo layliska 6.11 shaqo fasal ahaan iyo shaqo guri ahaanba.

Jawaabaha hawlgalka 6.8

2. Kh. haa d. haa r. haa
3. haa, waayo, dhinacyada isu-beegani iyo xaglaha ΔABC iyo ΔDEF wey isu-sargo'an yihiin

Jawaabaha layliska 6.8

1. ΔCAB iyo ΔDEF
   1. m (∠E) = m (∠A) = 30°
   2. AB = EF = 3s m
   3. m (∠F) = m (∠B) = 70°
      si loo caddeeyo in ΔCAB ≡ ΔDEF
   1. m (∠E) = m (∠A) siin
   2. ∠E = ∠A talaabada 1^{aad} iyo qeexida sargo'naanta xaglaha.
   3. $\overline{EF} = \overline{AB}$ siin
   4. $\overline{EF} \equiv \overline{AB}$ talaabada 3 iyo qeexida isu sargo'naanta xariijimaha.
   5. m (∠F) = m (∠B) siin
   6. ∠F ≡ ∠B talaabooyinka iyo qeexida isu-sargo'naanta xaglaha.
   7. ΔDEF ≡ ΔCAB talaabooyinka 2, 4, 6 iyo
      Dhardhaaka ASA ee isu-sargo'naanta seddexagalada.

2) Siin

   1. ∠BAC ≡ ∠DEC
   2. $\overline{AC} \equiv \overline{EC}$

   Si loo caddeeyo in ΔABC ≡ ΔEDC

Fallanqeyn

1. ∠BAC ≡ ∠DEC siin
2. $\overline{AC} \equiv \overline{EC}$ siin

3. $\angle ACB \equiv \angle ECD$ xaglo foodsaar ah
4. $\Delta ABC \equiv \Delta EDC$ talaabooyinka 1, 2, 3 iyo Dhardhaarka ASA ee isu-sargo'naanta seddexagalada.

5) $\angle B \equiv \angle D$

6) $\overline{HE} \equiv \overline{LM}$

7) $\Delta ABC \equiv \Delta MLN$ . . . ASA

Hadaba, $\overline{AC} \equiv \overline{MN}$

Sidaas darteed, MN = 35 m

6.4 CABBIRAADA

Waqtiga loo qoondeeyey: 12 xiisadood

Waxa laga rabo ardayga

Dhammaadka cuttub-hoosaadka ardaydu waxay awoodi doonaan in ay:

- *ka soo dhiraandhiriyaa qaaciidada bedka seddexaglaka quman, bedka laydiga*
- *ka shaqeeyaan bedka seddexagalka quman*
- *u bedelaan sentimitir labbajibaaran, mitir labajibbaaran iyo kasoo horjedka*
- *ka shaqeeyaan wareega seddexagalada*
- *daahfuraan qaacidada mugga birisam laydiyeedka*
- *u bedelaan sentimitir seddexjibbaaran litir iyo mitir seddexjibbaaran iyo ka soo horjeedka.*

Ereyo cusub

Laydi, seddexagal, seddexagal quman, Bed, wareeg, helbeeg labbajibaarn, mitir labajibbaaran, sentimitir labajibbaaran, hektar, Birisam laydiyeed, mug halbeeg seddexjibaaran, mitir seddexjibaaran, sentimitir seddexjibaaran, litir iyo miliilitir.

Hordhac

Cinwaan-hoosaadkan ardaydu waxay la qabsan doonaan sawirada (shaxanada) sallaxyada sida (shaxanada) sida laydiyada iyo seddexagalada iyo cabbirka wareegyadooda iyo Bededkooda. Waxay isku bedeli doonaan halbeegyada bededka ayagoo mid u bedelaya halbeeg kale waxa kale oo ay soo saari doonaan muggaga Birisamyada iyo waliba waxay isu bedeli doonaan halbeeg yada mugga ayagoo mid u bedalaya ku kale. Cuttub-hoosaadku wuxuu u sii qeybsamaa laba cinwaan-hoosaad ka koowaad wuxuu ka hadlaa bedka seddexagalka quman iyo wareega seddexagalada ka labaadna wuxuu ka hadlaa mugga Birisam laydiyeed.

6.4.1 Bededka seddexagalada quman iyo wareega seddexagalada

Gudbin casharka

Ku bilow cinwaan-hoosaadkan adigoo u nakhtiimaya noocyada kala duwan ee seddexagalada ayadoo xooga aad saarayso seddexagalka quman seddexdiisa dhinac waxay leeyihiin magac gaar ah labada dhinac ee gaaban waxaa la yidhaa lugaha, dhinaca ugu dheerna waxaa la yidhaa shakaal. Xasuusi ardayda qaaciidada wareega iyo bedka ee laydiga kaasoo ay ku soo dhigteen fasalka 5^{aad}.

Dabadeed isticmaal hawlgalka 6.9 adigoo ardayda ku firfircooni galinaya u qeybi ardayda kooxo ka kooban seddex seddex hana ka doodaan hawlgal waxoogaa miridho ah. Adigo ku salaynaya jawaabaha ardaydu bixiyaan u nakhtiin qaacidada bedka laydiga barna xariiqda isu-xidha laba gees oo kasta oo iska soo horjeeda ee laydiga ama (xagal-gooye) dabadeed ardaydu ha ka shaqeeyaan hawlgalka 6.10 ujeedada hawlgalkani waa in ardayda laga caawiyo siday u daahfuri lahaayeen qaaciidada bedka sedeexaglaka quman, ta bedka laydiga.

Adigoo ku salaynaya jawaabaha ardayda barqaaciidada bedka seddexdagalka quman kuna taageer qaaciidada tusaaleyaal u isticmaal jaaniskan si aad ardayda u tustid sida loogu bedelo helbeegyada bedka halbeeg kale oo bedku leeyahay dabadeed ardaydu ha ka shaqeeyaan layliska 6.12 shaqo fasal ahaan iyo shaqo guri ahaan. Marka ay layliska dhameeyaan ka dib xasuusi ardayda waxa uu yahay wareega shaxan sallax ahi, dabadeedna sheeg qaaciidada wareega seddexagalka ku taageer qaaciidada tusaaleyaal dabadeed ardaydu ha ka shaqeeyaan layliska 6.13 shaqo fasal ahaan ama shaqo guri ahaan.

Jawaabaha hawlgalka 6.9

1. b. laydigu waa afar-dhinacle leh 4-dhinac oo labada iska soo horjeedaaba ay isu-sargo'an yihiin, oo dhamaana afartiisa xaqlood ay yihiin xaglo quman.
   t. 90°
2. b. 12 sentimitir oo labajibbaaran t. Badka laydiga
3. b. (dh × b) oo halbeeg labajibaaran t. beedka laydiga

Jawaabaha hawlgalka 6.10

1. b. 2 sm × 5 sm = 10 sentimitir labajibbaaran.

x.



Maadaama $\overline{BX} \equiv \overline{TJ}, \angle X \equiv \angle T$ iyo $\overline{XJ} \equiv \overline{TB}$ dabadeed $\Delta BXJ \equiv \Delta JTB$ SAS

Kh. Maadaama $\Delta BXJ \equiv \Delta JTB$ dabadeed bedka ΔJTB

d. $a(\square BTJX) = a(\Delta BXJ) + a(\Delta JTB)$

$= 2a(\Delta BXJ)$

Sidaas dardeed, badka ΔBXJ $\Delta BXJ = \frac{1}{2}$ bedka $\square BTJX$

2. t. Bedka (ΔMOP) = Badhka Bedka $\square$ BTJX j. haa

Jawaabaha laylisak 6.9

1. 24 sm labajibbaaran

2. $A = \frac{1}{2}bt$

$24 = \frac{1}{2} \times 8 \times t \Rightarrow 24 = 4t$

$JA = \frac{24}{4} = 6$ sm

3.

b	t	A
3	4	6
6	8	24
18	24	216

A = Bedka

4. Bedka shaxaanku = Bedka seddexagalka + Bedka laydiga

$\frac{1}{2} \times 5 \times 12 + 6 \times 12 = 30 + 78 = 108$ halbeeg labajibbaaran

5. b. 5 mitir labajibbaaran t. 0.1 mitir labajibaaran
   j. 60,000 mitir labajibaaran

6. b. 80,000 sentimitir labajibbaaran
   t. 6000 sentimitir labajibbaaran
   j. 5,000,000,000 sentimitir labajibaaran

7. b. 6 hektar t. 4 hektar j. 0.012 haktar

8. Bedka gobolka hadhaysani = Bedka laydiga – Bedka seddexagalka

$= 5 \times 24 - 2\left(\frac{1}{2} \times 3 \times 4\right) = 120 - 12 = 108$ sentimitir labajibbaaran

9. b. 8 + 11 + 13 = 32 sm t. 21 + 11 + 25 = 57 sm
   j. 9 + 12 + 15 = 36 sm
10. 7 sm
11. b. 24 sm t. 24 sentimitir labajibbaaran
12. Wareega gobolka hadhaysani = wareega laydiga + 2 (3 + 4)
    = 2 (5 + 4) + 2 (7) = 10 + 14 = 32 sentimitr

Qiimeyn

Waxaad ku qiimeyn kartaa ardayda adigoo weydiiya su'aalo afka ah oo cinwaan hoosaadka la xidhiidha isticmaal hawlgalada 6.9 iyo 6.10 si aad ugu qiimeyso fahamka ardayda u sii layliska 6.12 iyo 6.13 shago fasal ahaan iyo shago guri ahaan ha ilaawin in aad u hubiso shaqadooda si joogta ah, aanad siisid jawaab celin. Dhiirigeli ardayda laylisyada si sax ah uga soo shaqeeyey.

6.4.2 Mugga Birisam laydiyeedka

Gudbinta casharka

Waxaad ku bilaabi kartaa cinwaan-hoosaadkan adigoo u dul-maraya qaaciidooyinkii laga soo. Dhiraan-dhiriyey muggaga Birisamyada iyo seddexjibaarane-yaasha ee fasalkii 5^{aad} si aad u xoojiso doodan waxaad isticmaali kartaa hawlgalka 6.11 shaqo kooxeed ahaan u agolow ardaydu inay ka doodaan hawlgalka 6.11 waxooga miridho ah. Adigoo ku salaynaya jawaabahooda. Waxaad sheegi kartaa qaaciidada mugga birisamyada ku taageer qaaciidada mugga tusaaleyaal dabadeedna ka dooda sida halbeega mugga loogu bedeli karo mid kale waa inaad ku xoojisaa doodan tusaaleyaal iyo laylisyo aad u hubi in ardaydu fahmeen sida halbeegyada mugga loogu bedelo mid, midkale, waxaad ku tijaabin kartaa fahamka ardayda layliska 6.14. Su'aalaha qaarkood shaqo fasal ahaan u sii inta hadhayna shaqo-guri ahaan u sii.

Jawaabaha hawlgalka 6.10

1. b. $3 \times 4 \times 8 = 96$ sentimitir seddexjibaaran
   t. $3 \times 4 \times 5 = 60$ senitmitir seddexjibbarah
2. dh × b × J halbeeg seddexjibbaaran
   dh = dherer
   b = ballac
   J = joog

Jawaabaha layliska 6.9

1. 300,000 litir
2. Joogu = 6 sm
3. b. 3000 mitir seddexjibbaaran t. 500 mitir seddexjibbaaran
   j. 92 mitir seddexjibbaaran
4. b. 5,000,000 sentimitir seddexjibbaaran
   t. 27,000,000 sentimitir seddex jibbaaran
   j. 32,000,000 sentimitir seddexjibbaaran
5. b. 62,000 millilitir t. 5000 mililitir
   j. 96,000 milliliitr
6. b. 2000 sentimitir seddexjibbaaran
   t. 5 sentimitir seddexjibbaaran
   j. 11,000,000 sentimitir seddexjibbaaran.
7. b. 2000 litir t. 5000 litir j. 8000 litir
8. b. 0.3 litir
9. qiyaasta hawada ahi = mugga qolka
   $= 3 \times 5 \times 12 = 180$ mitir seddexjibbaaran
10. V = Bedka salka × Jooga

    $200 = 5 \times 5 \times J$

    $200 = 25\ J$

    $J = \frac{200}{25} = 8$ mitir

Qiimeyn

Waxaad ardayda ku qiimeyn kartaa adigoo weydiya su'aalo afka ah iyo in aad siiso laylis shaqo fasal ahaan iyo shaqo guri ahaanba. Waxaad siin kartaa oo kale laylisyo aad meelo kale ka keentay ha ilaawin'n aad shaqadooda u saxdo si joogta ah. Ardayda ku dhiirigali in ay casharka ka qeyb-qaateen markaaad dhigayso.

Jawaabaha laylisyada nakhtiinka ah (layliska guud)

1. Joogu = 32 ÷ 16 = 2 sm
2. b. xaglaha dhamaysira iyo ku-buuxaha xagasha 20° waa 70° iyo 160° siday isugu xigaan.
   t. xaqlaha dhammaystira iyo kuwa buuxsha xagasho 30° waa 60° iyo 150° siday isugu xigaan.
   j. xaglaha dhammaystira iyo kuwa buuxha xagasha 45° waa 45° iyo 135° siday isugu xigaan.
3. 6 sm

4. 8 sm
5. Ka soo qaad xagashu inay tahay x, dabadeed xagasha ay isbuuxsheen waa (180° - x) dabadeed 180° - $x = 2x + 30°$
   $\Rightarrow 180 - 30° = 3x \Rightarrow 150° = 3x$
   $\Rightarrow 50° = x$
   Cabbirka xagashu waa 50°
6. b. xaglo isku-beegan t. xaglo-gudeed talantaali ah
   j. xaglo foodsaar ah x. haa
   kh. marka ℓ_1 ay barbaro la tahay ℓ_2
7. Ururada tirooyinka (b) iyo (j) waxay noqon karaan kuwo ku calaamadsan dhererada dhinacyada seddexagal.
8. $\angle T$ waa xagasha ugu dheer.
9. $\overline{FG} \equiv \overline{MN}$
10. Marka loo eego dhardhaarka SAS
11. Haa, dhardhaarka SAS
12. **Falanqeyn**
    1. $\overline{BC} \equiv \overline{BD}$ . . . siin
    2. $\overline{CO} \equiv \overline{DO}$ . . . siin
    3. $\overline{BO} \equiv \overline{BO}$ . . . dhinaca ay wadaageen
    4. $\Delta CBO \equiv \Delta DBO$ . . . talaabooyinka 1, 2, 3 iyo dhardhaarka SSS.
    5. Sidaas darteed $\angle CBO \equiv \angle DBO$ talaabada 4 iyo qeexida isu-sargo'naanta seddexagalada.
13. $\Delta MNO \equiv \Delta MQO$ . . . dhardhaarka SSS
    Siddaa awgeed m ($\angle MNO$) = m ($\angle MQO$)
    Laakiin m ($\angle MQO$) = 65°
    Hadaba m ($\angle MNO$) = 65°
14. 2 mitir seddexjibbaaran
15. 5 mitir labajibbaaran

Muqararka Xisaabta Fasalka 6aad

HORDHAC

Andayda fasalka 6aad waa in laga taageero laguna dhiirlgeliyo in ay gaadhaan heer ay xisaabta u isticmaalaan ama u adeegsadan aalado (Tools) ka caawinaya in ay si fiican u falmaan una gartaan waxyaabaha ka dhacaya Agagaarkooda carruurta Anmiysan in ay xisaabtu tahay Aalad faa'iiddooyin badan u leh waxay Horumar la Taaban karo ka gaadhi doonaan dhinaca Aragtida (Attitude) xisaabta. Haddaba iyada oo laga duulayo Hawlgaallo Qorshaysan ayaa Ardayda waxaa lagu dhiirigelin karoo in ay Xisaabta u adeegsadeen Hal-Abuur ahaan iyo Hab-dhis ahaan (Systematically) .Aidaas oo kale iyada oo Ardaydu ay wadaagayaan khibradahooda ayaa waxay xisaabta u adeegsan doonaan in ay tahay sansaanta Isgaarsiin aysaa (Isku xidhaysa) Qeexidda, saadaasha iyo Tarjumidda (Sharraxka bixinta) Taasdarteed xoog saariddooda (Their concentration) iyo isku taxalujintooduba (Their Persistence) waxay ku mutaysan doonaan guulo lagu Qanci karo (Kalsooni lah) oo ay Abaal marin ku helaan.

Caruurta yar-yar waxay u baahan yihiin in laga kobciyo in ay aragti fiican ka haystaan xisaabta, si loo xaqiijiyo in ay ku siqaan (ku soo dhowaadaan) Barashada maadada xisaabta isla markaana ay u arkaan in Barashada xisaabtu tahay Wax fudud Balse aanay is arkin in ay tahay wax gaboobay oo aan la baran Karin Ardayda ku raaxaysata barashada Xisaabta isla markaana Aaminsan in guulo dhaxalgal ah laga gaadhayo xisaabta, waxaa ka muuqda I n ay yihiin kuwo aad u xiisaynaya barashada xisaabta gaar ahaan kuwa aad u Hiyikacsan (Motivated) ee doonaya in aad u baraan xisaabta.Kuwaas oo ah kuwa u arka ku-habboonaanshaha iyo ujeeddooyinka xisaabtu in ay tahay Hawlaha ay maalinkasta Qabtaan.

Abuuridda xaaladdaha Muujinaya Baahida laa Qabo xisaabta isla markaana si fudud loogu Dabbakhi karo xisaabta waa Arin Ahmiyada wey? U leh barashada xisaabta. Waxaa khasab ah in aad Taqaano heer ka bareshada Ardayda (Waxa ay yaqaanaan) iyo Hawlaha xisaabeed ee Ardaydu qabtaan Maalin kasta. Marka Ardayda la barayo xisaabdta, Hawlaha ay ka qaybtqaadanayaan maaha Fikraddaha (Macnaha) xisaabeed oo keliyo balse waa sida xisaabta loola xidhiidhinayo Nolol Maalmeedka Ardayda. Ardaydu waxay baran doonaan in ay Falmaan muhimadda ay xisaabtu u leedahay Natfooda, Tusaale ahaan waxay fahmayaan muhimadda ay tiradu u leedahay in wax ku tirsadaan, muhimadda uu waqtigu u leeyahay in ay sugaan waqtiga cuntada loo karinayo, muhimadda ay Tajebyadu u leeyihiin in ay Qaybo isle'eg u qaybsadaan khudaarta la siiyey iwan.

Ujeeddooyinnka Barashada Xisaabta Faslka 6aad

Aqoontii iyo xirfaddihii ay Ardaydu ku soo barteen xisaabta fasalka 5aad gaar ahaan Hab-dhisyada tirade, xisaabfallada Tirooyinka Doorsoomeyaasha, Isleegyada iyo Dheelliyada, cabbiraadda, Joomateriga, ururinta iyo Habaynta xogaha, iyo Itimaalka waxay noqonayaan kuwo si qolo dheer loogu qaadan doono xisaabta fasalka 6aad Haddaba aqoonta, katida iyo xirfaddaha xisaabeed ee heerarka soo socda ayaa waxaa la filayaa in agu gaadhi doono xisaabta fasalka 6aad

- Tibaaxidda saxda ah ee Erey-bixinta ururrada
- Soo soocidda Harmo-ururrada, Hormo-uruuada Qumman; ururrada isleleg iyo ururada Isudhigma

- Soo Saaridda dhextaalka iyo Isutagga ururrada
- Sawiridda jaantuska Feen oo lagu muujinayo isutagga iyo dhextaalka ururrada iyo furfurista weedh-xisaabeedyada fudud
- Soo soocidda marka Tiro idil ay haraa la'aan u Qaybsami karto 2,3,4,5,6,8,9iyo 10,
- Isku dhufashada Jajabyada iyo Jajab-Tobanleyaasha
- Isuqaybinta Jajebyada iyo Jojab-Tobanleyaasha
- Soo saaridda Dhufsane-yaraha ay wadaagaan (DH.Y.W)iyo Isir-Weynaha ay Wadaagaan (I.W.W) laba, tiro ama saddax Tiro oo Tirooyin Tirsiimo ah oo had-god ama lab-god ah
- Soo soocidda Tirooyinka mutuxan iyo tirooyinka farlan.
- Isbarbardhisidda iyo Horsanaanta Abyooneyaasha iyada oo la adeegsanayo xarriiqda tirade
- Isugeynta Tiyo kalagoynta Abyooneyaasha iyadaoo la adeegsanayo ama aan la adeegsanayn Xarruada Twada
- Jajabka oo loo bedelayo Jajab-tobanle iyo Boqolkuba
- Isku beddidda Jojab-Tobanleyaasha dhammaadka leh iyo Jajabyada midba kana kale
- Isku bedelidda Boqolkiiba oo loo bedelayo Jajabyada Iyo Jajab-Tobanleyaasha
- Isbarbardhigidda iyo Horsanaanta Jajabyada
- Furfurista Islelegyyada iyo Dheelliyada Toosan ee lagu Furfuri karo hal-Tallaabo iyo furfuristooda oo lagu Muujinayo xarriiqda tirade dusheeda
- Sharraxidda iyo Adeegsiga saamigalka Qumman iyo saamigal-Rogaalka ee fuifurista mas'alooyinka
- Sawiridda Garaafyada muujinaya saamigalka Qummaan iyo saamigal-Ragaalka
- Soo saarista kulannada Baraha iyo ku muujinta waaxda 1aad Baraha lagu siiyey Bar-kulannadooda
- Soo saarista wareegga iyo Bedlka saddexagalka labajibbaaranaha iyo laydiga
- Raadinta mugga Biriisam-laydiyeedka
- Isku bedelidda sentimitir labajibbaaran iyo mitir labajibbaaran midba kan kale
- Isku bedelidda sentimitir saddex jibbaaran iyo mitir saddex jrbbaaran midba kana kale
- Furfurista Mas;alooyinka la xidhiidha xaglaha ay sameeyaan laba xarriiqood oo Barbarro ah iyo gudbane.
- Soo soocidda xaslo Deris iyo xaglo faadsaarah iyo xaglo sbuuxsha iyo xaglo sidhammaystiro
- Sharxidda Astaamaha saddexaqalka ee Dhisidda saddexagallada iyo Qeexiddoodaba.
- Soo soocidda saddexagallo isku sargo;an iyada oo la adeegsanayo Tijaabooyinka Isku sargo;naanta saddexagallada (SSS;SAS;ASA)
- Dhisiddda saddexagallada iyada oo laga duulayo cabbirkooda lagu siiyey.

Cutubka: 1aad FIKRADDAHA AASAASIGA AH EE URURRADA
(19 Xisadood)

Ujeeddooyinka Guud ee Cutubkan:
Cutubkani marka uu dhammaado kadib, Ardaydu waxay Awood u yeelan doonaan)
Awood u yeelan karaan)

- Fahmidda Fikradda (Macnaha) Urur
- Sharxidda Xidhiidhka ka dhexeeyalaba urur
- Soo Bandhigidda Xisaabfallada (Dhextaalka iyo Isutagga) ururrada

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	**Ciwaannada Cutubka, Qaybaha iyo Casharrada**	**Waxqabadyada Baris-Barrashada iyo Qalabyada loo baahan yahay**	**Tallaabooyinka Qiimeynta**
Ardaydu waa in ay Awacdi kajaan • Sharxidda waxa uu yahay maanaha urury iyo ku-Tirsaney	1. Fikaraddaha Aasaasiga ah ee uruuada 1.1 Barashada Macnaha ururmda (3xiso)	• Ku dhiirigeli Ardayda in ay ku siiyaan Tusaaleyaal ay nqaskax dooda ka keeneen oo ku saabsaan macnaha urur (Sida ururka Gabdlaha Ardayda Fasalkooda) • Ku hag ardayda in ay la yimgadaan (Keenaan) macnaha uruntadhan iyo Tusaaleyaal sida ururka Ardayda Fasalkiina ee dadoodu tahay 100 sano • Ka caa wi Ardayda in ay Adeegsa daan summaddaha iyo Ereyada la xidhiidha Urur	• Weydii Ardayda in ay soo bandhigaan Tusaaleyaal ku saabsan ururrada
• Sharxidda xidhiidhka ka dhexayn kara ururrada sida Hormo-urur Hormo-urur-Quman ururo isle'eg iyo ururro isu dhigma	1.2 Xidhiidh ada ururrada (6xiso)	• Fursad u sii Ardayda in ay soo soocaan isla markaana si ficil ah ugu celceliyaan Macnaha "Hormo-urur" • Hormo-urur-Qumman ; ururro isleleg "Ururro isu dhisma"	• Sii Ardayda laylis yo kala duwan oo ay ku soo saaro yaan Hormo-ururka hormo ururka Quman ururo isla'eg iyo ururro isu dhigma

